Tusmada

loogu talagalay degganayaasha xarumaha soo dhowaynta magangelyo-doonka

SOMALI



UDI
Utlendingsdirektoratet

Nuxurka

		Gacaliye deggane	3
	Cutubka 1aad	Coodsiga magangalyada	5
	Cutubka 2aad	Caafimaadka	11
	Cutubka 3aad	Waxbarashada	17
	Cutubka 4aad	Bulshada Norwejiyaanka	21
		Tilaab-tilaab socodsiinta magangalyada	26
	Cutubka 5aad	Garashada sharciga	31
	Cutubka 6aad	Dib ugu laabasahada dalka (guriga)	37
	Cutubka 7aad	Markii lagu siiyay fasaxa degganaashaha ee Norway	41
	Cutubka 8aad	Magangalyo-doonka ka yar 18 jir	49

Gacaliye deggane

Magacayga waa Mohamed. Agaasinka Soo-gelootiga ee Norwejiyaanka (UDI) waxuu i waydiistay inaan kuu soo bandhigo buuggaan yar, oo aan rajaynaayo inuu ku noqdo mid waxtar iyo anfacaad leh.

Waxaan ahay takhtar yimid Norway biloowgii 2004 si qaxooti ah. Kuma nooli Norway waqti dheeri, laakin waxaan ogahay sida ay muhiim u tahay aqoonta dalka ay ahaan karto. Adigoo ah qof cusub ee yimid dalka, waxaad ogaan doontaa inay jiraan waxyaabo badan oo aad baran doontid, laakin haddii aad wax badan ka ogaatid Norway noloshada ayaa ku fududaynaysa inta aad halkaan joogto. Waxaad u baahan tahay inaad wax ka ogaato habka waxbarashada ee Norwejiyaanka si ay caruurtaada wax uga baran karaan intii suurto gal ah dugsiga. Waxaad u baahan tahay inaad ogaato shuruucda Norwejiyaanka si aadan u jebin. Waxaa kale muhiim ah inaad ogaato sida dadka Norwejiyaanka ah naf ahaantooda u nool yahiin una shaqeeyaan.

Waxay dumarka u baahan yahiin inaad ogaadaan waxyaabaha sida gaarka ah ugu muhiimsan. Waxay qooysaska caruurta leh u baahan yahiin inay ogaadaan arrimaha khuseeyo xaaladdooda, waxayna caruurta u baahan yahiin wararka ku habboon baahidooda.

Kuwa coodsiyadooda la soo diiday waxay u baahan yahiin warar ka duwan kuwa loo soo oggolaaday inay joogaan Norway.

Maaddada lagu soo bandhigay buuggaan yar waxaa si aad u badan looga hadli doonaa si faahfaahsan barnaamajka wararka ee xarunta soo-dhowaynta, kaasi oo dabooli doono moowduucyo badan.

Waxaa buuggaan yar looga dan lee-yahay inuu kaa caawiyo inaad barato waxa ku saabsan xuquuqdaada, waajibaadkaaga iyo fursadahaada oo aad ku lee-dahay Norway, iyada oo loo eegin in laguu oggolaan doono inaad joogto halkaan ama in lagu waydiistay inaad ka baxdid.

Markii la joogo xarunta soo-dhowaynta waxaa lagu la socodsiin doonaa waxyaabaha ku saabsan nidaamka guriga, nidaamyada deb-demiska, nidaamyada lacagta, nidaamyada degganaanshaha xarunta soo-dhowaynta iyo nidaamyada lagu maamulo ka maqnaanshaha xarunta soo-dhowaynta. Waxaa kale ay hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta kuu sheegi doonaan waxaad samaynaysid haddii aad u baahato takhtar, iyo waxa ku saabsan gaadiidka, dukaamanka, dugsiyada iyo xanaano-maalimeedka ee dugsiga ka hor.

Waxay xarumaha soo-dhowaynta siyaan degganyaasha tiro waxqabdyo ah. Waxaad waydiin kartaa waxqabadyada aad ka qayb qaadan karto.

Adigoo ah qof cusub ee yimid dalka, waxaad ogaan doontaa inay jiraan waxyaabo badan oo aad baran doontid, laakin haddii aad wax badan ka ogaatid Norway noloshada ayaa ku fududaynaysan inta aad halkaan jogto.

Waxaa kale oo buug yarahaan laga heli karaa
www.nyinorge.no

– Markii aad soo coodsanaysid magangalyo, ama waa laguu oggolaanayaa inaad joogto, ama waa inaad dib ugu noqotaa dalkaaga (gurigaaga)

Cutubka 1aad

Coodsiga magangalyada

Waxay sharciga Norwejiyaanka iyo heshiisyada caalamiga fasir-ayaan in laguu oggolaan doono inaad joogto Norway iyo inkale. Waxuu Cutubkaan kuu micnaynayaa waxa dhacaya marka aad soo coodsanaysid magangalyada.

Dhammaan kuwa u baahan in lagu bad-baadiyo Norway waa la siinayaa. Wana sidaa waxa ay UDI ugu fiirinayso si taxadir leh coodsi kasto ee Magangalyo. Waxaa sidaan lagu magacaabaa habso-codsiinta magangalyada. Waxaa looga dan lee-yahay in loo sugo dhammaan kuwa si dhab ah ugu baahan badbaado in loo oggolaado inay joogaan, isla markaa kuwa aan u baahnayn waa inay ka baxaan Norway.

Habsocodsiinta magangalyada

Waxay UDI u fiirinaysaa coodsi kasto si gooni-gooni ah si loo hubiyo in qof kasto loo la dhaqmo si caddaalad leh. Waxaa coodsigaada loo la dhaqmayaa isla sidaas iyo sida ay qabaan isla shuru-ucda iyada oo loo fiirin qofka aad tahay.

Markii aad ka soo coodsanaysid Magangalyo Norway, waxaad ka soo codsanaysaa dowladda Norwejiyaanka inay ku badbaadiso. Waxay dowladda Norwejiyaanka dhihi kartaa haa ama maya coodsigaada. Waxaa la diiday coodsiyo badan ee soo samaysteen dad magangelyo-doon ah waana inay dib ugu noqdaan dalkooda.

Waxay UDI la yeelanaysaa waraysi soo-coodsade kasto waxayna u istimaa-laysaa natiijooyinka ka soo baxo warar kale si loo go'aamiyo inaad u qalantid magangalyada iyo inkale. Waxay kale ay UDI u lee-dahay aqoon waxqabad wayn ee ku saabsan dalkaaga.

Magangalyada

Waxaad xaq ugu lee-dahay magangalyo ee Norway haddii naftaada ama xuri-yaddaada ay ku jiraan halis, ama haddii aad halis ugu jirtid jir-dil ama xumaan kale oo loo gaysto bani'aadamka sabab-ta oo ah aaminaantaada siyaasadeed. Waxaa isla nidaamka lagu dhaqayaa haddii laguu cadaadinaayo caqiiddada diintaada ama aad ka tirsan tahay jinsi-yad gaar ah, ama xoog bulshadeed ama jisiyeed.

Waxaa dumarka la siin karaa magan-galyo haddii ay cadaadis ugu jiraan ujeeddada ah inay yahiin gaar ahaan

Waxaad ku lee-dahay Norway xaqqa magan-galyada haddii naftaada ama xuriyaddaada ay halis ku jiraan, ama haddii aad halis ugu jirtid jir-dil ama noocyo kale oo ku xun bani'aadamka.

Dherirka waqtiga uu qaadanaayo in go'aan laga gaaro coodsigaada arrinba arrin ayay ka duwan tahay. Haddii ay qaadato waqti dheer, waxay sababta noqon kartaa in UDI uu baaraayo in wararka aad bixisay ay yahiin sax iyo in kale.

dumar. Sababta oo ah cadaadiska galmada- ahaanshaha qaniisnimada, tusaale ahaan- waxuu u noqon karaa sabab magangalyada. Waxuu qorayaa heshiiska Qaramada Midoobay faahfaahino dheeri ah ee ku saabsan Xaaladda Qaxootida.

Haddii maamulayaasha ka jiro dalkaaga ay kaa badbaadin karaan kuwa ku cadaadinaayo, sida caadiga ah uma qalantid in lagaa siiyo magangalyo Norway. Caadi ma aha in la siiyo magangalyo dadka ku nabad-gelaayo meelo kale oo ah dhulkooda hooyo.

Badbaadada

Waxaad weli lagaa siin karaa Norway fasaxa degganaanshaha xitaa haddii heerka cadaadiska oo aad la kulantay uusan ku filnayn in lagu siiyo magangalyo siyaasadeed. Waxay sidaan ku noqon kartaa sababta ah inuu ka socdo dagaal dhulkaaga hooyo ama aad halis ugu jirto in laguu la dhaqmo xumaanta loo gaysto bani'aadamka.

Sababaha bani'aadanimo

Markii, ay jiraan arrimo gaar ah waxaa laguu oggolaan karaa inaad joogtid Norway haddii adiga ama caruurtaada ay qabtaan cudur aad u xun oo an lagu daawayn karin dalkaaga.

Degganaanta

Waxaa ku la soo socodsiinaayo booliska haddii lagu siiyay fasaxa degganaanshaha ee Norway. Waxaa markaa ka dib kuu bilaabanayso u diyaar garoowga noloshaada gudaha Norway. Waxaa ka akhrisan kartaa wax intaa ka sii badan Cutubka 7aad.

Waqtiga sidee ay qaadan kartaa?

Dherirka waqtiga uu qaadanaayo go'aaminta coodsiga magangalyada waxay uga kala duwan yihiin arrinba arrin. Haddii ay qaadanayso waqti dheer, waxay sababta noqon kartaa inay UDI baarayso in wararka aad siiday ay sax yahiin iyo inkale. Waxay noqon kartaa inay UDI fiirinayso xaaladda haatan ka jirto dhulkaaga hooyo.

Haddii la soo diido coodsigaada, waxaad ka soo qaadan kartaa racfaan. Waxaa racfaankaaga eegaayo Guddiga Racfaanada Soo-gelootiga (UNE). Waxay sida caadiga ah ku qaadanaysa UNE ugu yaraan 10 bilood inay go'aan looga soo gaaro.

Soo diidmada UDI

Haddii uu UDI diido coodsigaada magangalyada, waxaa laguu qabanayaa qa-

reen kaa caawiyo. Waxuu UDI u diraaya la socodsiinta diidmada qareenkaaga. Waxuu qareenkaaga kuu soo sheegayaa in la soo diiday coodsigaada waxuuna kuu sheegayaa sababta. Waxuu qareenka ku qabanqaabinayaa tarjubaan haddii aadan ku hadlin luqaddiisa.

Waxaad xaq u lee-dahay inaad ka qaadatid racfaan lid ku ah diidmada UDI. Waa inuu qareenkaaga ku soo hor dhigaa racfaankaaga UDI wax aan ka yareen seddax toddobaad ka dib markii lagu soo gaarsiiyay la socodsiinta diidmada.

Waxuu qareenkaaga kaa caawinayaa sida loo qaabayn lahaa racfaankaaga. Haddii uu UDI sii wado diidmadiisa in kasto oo loo keenay racfaanka, waxaa arrintaada loo dirayaa Guddiga Racfaanka Soo-gelootiga (UNE) si ay uga gaaraan go'aanka kama danbaysta ah. UNE waa hay'ad gooni ah oo wax ka qabato racfaanada soo-gelootiga.

Inta uu qareenkaaga diyaarinaayo racfaankaaga, asaga/ayada waxay waydiisanayaan in laguu oggolaado inaad sii joogtid Norway ilaa inta laga eegaayo racfaankaaga. Waxuu UDI ka gaarayaa go'aan haddii laguu oggol yahay inaad sii joogto Norway inta la eegaayo racfaankaaga. Waxaa sidaas darteed lagu waydiin karaa inaad ka baxdid Norway ka hor inta laga gaarayo go'aanka ugu danbeeyo.

Diidmada UNE

Haddii UNE xitaa ay soo diido coodsigaada, waxay sida caadiga ah tahay inaad uga baxdid dalka waqti ah labo toddobaad gudeheeda.

Waxaa looga qaadan karaa racfaan maxkamadaha diidmada ugu damabyso ee UNE. Haddii aad samayso sidaas, si kastaba ha noqotee, waxaa iska bixinaysaa kharasyadaada ku baxaayo sharciga. Waxaad waydiisan kartaa maxkamadda inay amarto in UNE uu dib u eego arrintaada (Coodsiga dib u Eegidda). Caadi ahaan ma laguu oggolaanaayo inaad sii joogto Norway inta UNE uu sii eegaayo coodsigaada dib u eegidda.

Dib ugu noqoshada dalka

Haddii la soo diido coodsigaada Magangalyo, waa inaad ka baxdaa dalka. Waxaa ka coodsan kartaa Ururka Caalamiga ee Socdaalka (IOM) caawinaadda socdaalka dib u noqoshada. Waxuu IOM kaa bixinayaa kharashyada socdaalkaa-

Haddii la soo diiday coodsigaada Magangalyo, waa inaad ka baxdid dalka. Waxaad ka coodsan kartaa Ururka Caalamiga ee Socdaalka (IMO) inuu kaa caawiyo socdaalka dib ugu noqoshada.



Haddii aad horay u joogtay dal kale oo nabad ah ka hor intaadan imaan Norway, waxaa coodsigaada Magangalyo eegaayo dalkaas.

ga waxuuna ku siinayaa waxyaabo kale oo waxqabad ah haddii aad la socdaalaysid iyaga. Waxaad wax intaa ka sii badan ka akhrisan kartaa Cutubka 6aad: Dib ugu laabashada dalka (guriga).

Caruurta

Caruurta ka yar 18 jir ee la soo coodsanaayo magangalyada waaliddiintooda waxay ku jiraan coodsiyada waaliddiintooda. Waxay waaliddiinta sheegi karaan haddii aysan doonayn in UDI uu la yeesho waraysi caruurtooda. Waxay xaaladda caruurta samayn muhiim ah u lee-dahay tixgelinta UDI ee coodsiga magangalyada qooyska.

Haddii waalidiinta la siiyo fasaxa ay ku degaayaan Norway, waxaa caruurtooda ka yar 18 jir xitaa loo oggolaanayaa inay joogaan. Guud ahaan, waxaa lagu dabaqayaa isla mabda'daas haddii coodsiyada waaliddiinta la soo diido. Si kastaba ha noqotee, waxaa kale oo coodsiga cunug kasto loo eegayaa mudnaanta goonida ah uu lee-yahay.

U celinta dalka oo nabad ah

Haddii aad horay u soo joogtay dal kale oo nabad ah ka hor intaadan imaan Norway, ama aad ka haysato dal ku gal (visa) dal kale oo nabad ah, waxaa coodsigaada magangalyada eegaayo dalkaas. Waxaa sidaas darteed laguu diri karaa halkaasi. Waxaa sidaan lagu magacaabaa Habsocodka Dublin. Waxay dhammaan dalalka Midowga Yurub (EU) sidaasi oo kale Norway iyo Aysland ka mid yahiin nidaamkaan.

Haddii ay arrin kaa taalo Dublin, waxaa naf-ahaan soo dhammaystiri kartaa foomka waana lagu waraysanayaa, laakin maamulada Norwejiyaanka ma tixgelinayaan coodsigaa magangalyada. Mana lagu siinaayo fasaxa ah inaad ka shaqayso Norway inta laga sugaayo in la gaaro go'aan.

Xaaladaha waxyeelo ku yeelan karaan sida loo qabanaayo coodsigaada magangalyada

1. Dembiga

Haddii aad jebisid sharciga ee Norway inta aad tahay Magangalyo-doon, waxay UDI wax uga qabanaysaa coodsigaada si degdeg ah. Haddii la soo diido coodsigaada, waxaa laguu dhoofinayaa si degdeg ah. Waxaad kala kulmaysaa dhib si aad soo geshid taariikh dambe Norway iyo qaar ka mid ah dalal Yurub.

2. Wararka dheeriga ah ee aan la bixin intii lagu jiray waraysiga

Haddii, ka dib waraysigaaga, aad dareemaysid inaad haysid warar dheeri ah oo u noqon karaan muhiim coodsigaaga magangalyada, waa inaad si degdeg ah ugu soo sheegtaa UDI. Waxaad xaq iyo waajib u lee-dahay inaad u soo sheegtid wararka muhiimka ah si degdeg ah. Kala hadal hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta haddii ay jirto wax shaki ah.

Fasaxyada shaqada ku meelgaarka

Waxay dadka ka soo coodsanaayo magangalyo Norway la siin karaa, markii ay jiraan xaalado qaarkood, fasaxa shaqada oo ku meel gaar ah inta ay sugayaan in laga gaaro go'aan. Waa inay jiraan xaalado ka hor inta lagu siin fasaxa shaqada inta aad ka sugaysid go'aanka. Waydii hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta faahfaahinada dheeriga ah.

Waxii warar dheeri ah:

www.udi.no
www.noas.org
www.une.no



– Xanaanaynta caafimaadkaaga waxay noloshaada ka dhigaysaa mid raaxo leh xarunta soo-dhowaynta

Cutubka 2aad

Caafimaadka

Waxuu caafimaadka fiican muhiim u yahay qof kasto. Waxuu Cutubkaan ku siinayaa wararka ku saabsan nooca caawinaadda caafimaadka oo aad xaqqa u lee-dahay waxuuna kuu sheegayaa sida loo xanaaneynaayo caafimaadkaaga qof ahaaneed.

In la xanuunsan yahay ma ka dhigayso qalmidda magangalyo mid dhib ah. Waa in, sidaas darteed, ka hadashaa haddii aad la il-daran tahay wax xanuun ama jirro. Waxaad Norway ka heli kartaa daaweyn. Waxaad xitaa ka heli kartaa caawinaadda horumarinta caafimaadkaaga.

Waxaa dhammaan shaqaalaha xanaanada caafimaadka waajib ku ah inay dhoowraan waxyaabaha gaarka u ah bukaanlayda. Waxay sidaan micnaheedu tahay inaan loo oggolayn inay qof kale u sheegaan waxa ku saabsan xaaladdaada caafimaad, haddii adiga aad u fasaxdid mooyee. Ma loo oggolo xitaa inay magacaada siiyaan qof kale, ama ay la socodsiiyaan inaad tahay bukaan.

Ma u baahan tahay tarjubaan?

Waxaad xaq u lee-dahay inuu joogo tarjubaan haddii aadan hubin inaad fahmaysid waxa la sheegaayo. Waxay shaqaalaha xanaanada caafimaadka mas'uul ka yahiin inay kuu soo helaan tarjubaan haddii ay filaayaan in laga maarmin. Waxaa marmar lagu tarjumaa telefoonka. Haddii aad u baahan tahay tarjubaan, waa inaad horay u la soo sheegtaa ballankaaga aad u dhiganaysid takhtarka. Waxay qaadan kartaa dhoowr maalimood si loo helo tarjubaan. Waxaa dhammaan tarjubaanada waajib ku ah inay dhoowraan sirta.

Ku imaanshaha waqtiga

Haddii aad ballan u soo dhigatay xirfadlaha xanaanada caafimaadka, waxaa muhiim ah inaad ku timaadid waqtiga. Waa inaad u soo sheegtaa haddii aadan imaan karin, ama haddii aad dib uga soo dhacaysid. Haddii aadan soo ogaysiinin, waxaad dhuminaysaa ballankaaga waxaadna samaysanaysaa ballan kale. Sida nidaamka yahay, waxaad kale oo aad ku bixinaysaa kharsh ballan kasto oo aadan imaan.

Xanuun joogto ah/dhaawac culus

Haddii aad si joogto ah u xanuunsan tahay ama qabtid dhaawac culus, waa inaad la socodsiidaa hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta iyo/ama la soo xiriir isbitaalka deegaankaaga. Haddii aadan awoodin inaa la soo socodsiidid midkoodna, waa inaad waydiisataa qof kale inuu kugu caawiyo si aad u heshid daawayn. Waxaad wacdaa 113 haddii aad u baahan tahay ambulanso.

Waxaa dhammaan shaqaalaha xanaanada caafimaadka ee Norway waajib ku ah inay ilaaliyaan waxyaabaha gaarka u ah bukaanlayda. Waxay taa micnaheedu tahay inaan loo oggolayn inay u sheegaan qof kale waxa ku saabsan xaaladdada caafimaad, haddii aad adiga u fasaxin.

Waxay dad badan dareemaan cidlo iyo keli ahaan. Waa iska caadi in la calool-xumaado, ay hurdada xumaato, in la xanaago, la daalo ama la dareemo badbaado la'aan. Waxay dadka qaarkood ku dhaco madax-xanuun, xanuun ama labbo-labbo.

Arkidda takhtarka

La soo xiriir xirfadlaha xanaanada caafimaadka haddii aad jirran tahay ama aad qabtid dhibaatada caafimaadka. Gudaha Norway, waxuu qof kasto xaq u leeyahay inuu xusho takhtarka (Takhtarka Guud) oo ay si joogto ah loogu tegi karo. Waxay kale ay dadka magangalyo-doonka ah xaq u lee-yahiin inay lahaadaan Takhtarka Guud. Waa inaad wax ka bixisaa xoogaa kharashka latashiga markii aad arkaysid Takhtarkaaga Guud. Waxuu Takhtarkaaga Guud kuu dirayaa takhtar xirfad leh haddii ay noqoto laga maarmaan. Waxaa caruurta la siinayaa xanaanada daawaynta oo bilaash ah ilaa da'.

Daawaynta

Waxuu kiimistaha (farmashiga) Iibiyaa dhammaan noocyada daawada. Waxaa badeecada qaarkood laga gadan karaa maaqalka, laakin intooda badan waxaa soo qoraayo takhtarkaaga. Waxaa xoogaa daawooyin ah laga gadan karaa suuqyada waawayn (super markets) oo caadiga ah. Haddii aad doonaysid daawo u gaar ah cudur waqti dheer, waxay xukuumadda kaa bixinaysaa kharashka intiisa badan. Waxuu takhtarkaaga kuu qorayaa 'qoraalka buluugga' ka dibna waxaad bixinaysaa qayb yar oo ah inta ay joogto daawada.

Caafimaadka maskaxda

Ahaanshaha Magangalyo-doon aan mustaqbal sugan lahayn waa dhib. Waxuu waqtiga sugitaanka noqon karaa mid dheer. Dad badan way ka xumaadaan.
Waxay dadka qaarkii dareemaan cidlo iyo keli ahaan. Waa caadi in laga xumaado, in si xun loo hurdo, iyo in la xanaago, la daalo ama la dareemo sugnaan la'aan. Waxay dadka qaarkii qaadaan madax-xanuun, xanuun ama labbo-labbo.

Waxaa jiraan waxyaabaha qaarkood oo aad naf-ahaantaada samayn karto si aad u sii hagaajisid caafimaadkaaga maskaxda. Waxaa ku caawini karo inaad samaysid jimicsi maalin kasto. Orad, ciyaarta kubadda cagta, culays-qaadista, iyo ciyaarta waxay u fiican yahiin fiicnaanta jireed iyo maskaxeed. Waxaa la mid ah akhriska, waxbarashada iyo ka qaybgelidda waxqabadyada loo dhan yahay. Wax kasto oo kuu keenaayo inaad wax gaartid waa kuu fiican yahay. Inaadan waxba samayn inta aad ku jirtid sugidda ma kuu fiicno.

Kuwo badan ee ku jirro xarumaha soo-dhowaynta ee Magangalyo-doonka waxay la kulmeen noocyo kala duwan oo cadaadis ah, dagaal iyo xumaan. Waxay qaarkood u qaadeen dhibaatooyinka maskaxda oo xun kuwaasi



oo ah natiijada ka soo baxday waxa ay la kulmeen. Waxaa dhibaatooyinkaan sii xoojin karaan ku noolaanshaha dal iyo dhaqan aadan aqoon. La soo xiriir xirfadlaha xanaanada caafimaadka haddii aad la il-daran tahay dhibaatooyinka maskaxda aadna u baahan tahay caawinaad.

Caafimaadka maskaxda caruurta

Waxay caruurta u baahan yahiin qof fahamto oona kaalmayso. Caruurta la kulantay dagaal ama xumaan si gaar ah ayay u nugul yahiin. Waxaa la mid ah caruurta waayay kuwii ay jeclaayeen ama ka dhintay qof ay la degganaayeen. Waxay had iyo jeer ka baqaan inay keli ahaadaan, inay ku jiraan meel mugdi ah, ama waxay ka welwelaan inuu wax xun ku dhaco. Haddii ay caruurtaada ay la il-daran yahiin xanuun ay la kulmeen, waxaa aad u muhiim ah inaad u sheegtid hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta ama takhtarka.

Ka hortagga cudurka

Cuntada dheelitiran

Waxaad ku cuni doontaa Norway cunto ka duwan cuntada aad isticmaali jirtay. Xilliga jiilaalka waa inaad qaadataa fitamiinka D si aad u nagto maqnaanshaha Iftiinka qoraxda. Si aad u ceshato caafimaadka waa inaad cuntid cunto caafimaad leh, cunto dheeli tiran oo miisaaban. Waxaa fiican in la cuno miro (fruits), khudaar, kalluun, hilib iyo badeecada ka samaysan caanaha. Haddii aadan hubin cuntada kuu fiican, waxaad talo waydiisataa xarunta soo-dhowaynta.

Waxaa si gaar muhiim u ah inay caruurta cunaan waxyaabo sax ah. Sidaas darteed waa inaad isha ku haysid cuntada dheelitiran ee caruurtaada.

Nadiif ahaansho iyo caafimaad wanaag

Wa muhiim in meesha aad ku nooshahay ay nadiif ahaato. Waxay yaraynaysaa halista bukashada. Waxay bakteeriyada ka dhalan kartaa halka ay wasaqda daadsan tahay, sida jikada ama qolka qubayska. Meelaha lagu dhaqdo, musqulaha, biyo-mareenada iyo aagagga kale ee leh biyo waa in la nadiifiyaa.

Caafimaad wanaagga qof ahaaneed

Caafimaad wanaagga qof ahaaneed ee fiican waxuu yahay oo kale mid lagu baajinaayo cudurka. Waa inaad ku dhaqdid saabuun labadaada gacmood markii aad tagtay suuliga, ka hor iyo ka dambe markaad cunto diyaarisid.

Caafimaadka ilkaha

Waxay haraaga cuntada iyo bakteeriyada isku uruursadaan ilkaha dhexdooda.

Waxay caruurta u baahan yahiin qof fahmo oo u kaalmeeyo. Caruurta la soo kulantay dagaal ama xumaan si gaar ah ayay u nugul yahiin.

Cinjirrada waa difaaca lidka ku ah HIV. Isticmaal inta lagu jirro dhammaan noocyada isu-tegidda galmada oo ad la yeelanaysid qof aadan hubin inuu soo qaaday.

Si loo baajiyo inay daataan ilkaha, waa in ilkaha maalin kasto lagu nadiifiyaa buraashka ilkaha iyo daawada rumayga. Waa in ilkaha caruurta si taxadir leh loo nadiifiyaa. Bar caruurtaada inay xanaaneeyaan ilkahooda. In lo soo booqdo takhtarka ilkaha aad ayay qaali u tahay.

Caafimaadka galmada

Cudurada galmo ahaan laysku daarto

Waxaa dhammaan cudurada galmo ee laysku daarto lagu qaadaa galmada. Cinjirka iyo cinjirka dumarka (femidoms) waxay yahiin kuwa keliya ee looga hortegi karo faafinta cudurada galmo ahaan laysku daarto. Waxaad ka gadan kartaa cinjirrada suuqyada waawayn iyo farmashiga. Waxaa laga heli karaa cinjirka dumarka farmashiga.

Waxaad xaq u lee-dahay in si bilaash ah lagaaga baaro lagaana daaweeyo cudurada galmo ahaan laysku daarto. Tusaale ahaan, cudurada ku yimaado isu-tegidda galmada oo ah HIV, jabtada, waraabowga, Chlamydia iyo fajada.

Waxaad waydisataa hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta ama takhtarkaaga haddii aad jeceshahay inaad wax intaa ka badan ka sii ogaatid.

HIV/AIDS

Markii aad timid Norway waxaa lagu siiyay fursadda aad iskaga baartid HIV. Waxaa lagu qaadaa HIV isu-tegidda galmada aan layska ilaalin iyo dhiigga oo laysku gudbiyo. Waxaa kale oo lagu qaadi karaa HIV naasnuujinta.

Cinjirrada waa difaaca lidka ku ah HIV. Isticmaal inta lagu jirro dhammaan noocyada isu-tegidda galmada oo ad la yeelanaysid qof aadan hubin inuu soo qaaday.

Ma ku qaadi kartid HIV haddii maalin ka maalin la xiriirtid dad. Haddii aad qabtid HIV ama AIDS, waxaad xaq u lee-dahay inaad heshid caawinaadda daawaynta. Waxaad waydiisataa hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta ama takhtarkaaga haddii aad jeceshahay inaad ka sii ogaati wax intaa ka badan.

Gudniinka dumarka

Waa ka caadi gudniinka dumarka dhaqamada qaarkood. Gudaha Norway, waxuu mamnuuc uga yahay si xoog leh. Waxuu gudniinka dumarka ku saa'idinayaa naafaynta xubinta dhalmada. Gudaha Norway, qof kasto oo sameeyo ama ka qaybqaato samaynta naafaynta xubinta dhalmada waxaa lagu xukumayaa siddeed sanadood oo xarig ah. Waxaa lagu qaadayaa sharciga qof kasto oo ku nool Norway, xitaa haddii falka uu ka dhacay dibedda.

Dumar badan oo yimid Norway waa gudan yahiin. Waxuu gudniinka u keeni karaa dumarka dhibaatoooyin caafimaad oo aad u xun. Waxay xirfadlayaasha caafimaadka siin karaan talo iyo caawinaad kuwa horay loo soo guday.

Ka hortagga dhalmada

Waxay xirfadlayaasha xanaanada caafimaadka ku micnayn karaan hababka kala duwan oo aad u isticmaali kartid inaad iskaga celisid uurka. Waxuu habka caadiga ah ay ragga uga hortagaan uurka waa cinjirka. Waxay dumarka lee-yahiin noocyo kala duwan ay ku kala doortaan, tusaale, kaniiniyada ka hortagga uurka, durid iyo plasters, iyo coil (qalab lagu xiro afka ilmo galeenka). Ka la hadal xirfadlaha xanaanada caafimaadka waxa ku saabsan kan kugu habboon oona aad ugu fiican xaaladdaada.

Ilmo-dhicisinta

Gudaha Norway, waxay ku xiran tahay naagta inay ka gaarto go'aan inay iskaga joojiso uurka ay lee-dahay 12 toddobaad ee ugu horeeyo. Ma loo baahno oggolaanshaha takhtarka, wadaadka, imaamka ama qof kale. Ninka qabo xaaska ma u laha xaq inuu go'aan ka gaaro arrintaan, xitaa haddii u yahay aabbaha dhiciska.

Waa inay naagta kala xiriirtaa takhtar ama umuliso haddii ay jeceshahay inay iska soo tuurto. Haddii ay naagta jeceshahay inay iska soo tuurto ka dib markii uu uurka jirsaday 12 toddobaad, waa inay ka heshaa fasax guddiga takhaatiirta caafimaadka ee isbitaalka ugu dhow. Waxaa waajib ku ah umulisada ama takhtarka naagta inay ku caawiyaan coodsigeeda.

Xanaanada dhalmada ka hor
Markii aad uur lee-dahay waa in si joogto ah laguu la socdaa. Adiga ayaa iska leh go'aanka ah inaad jeceshahay inaad aragtid umuliso, takhtarka ama inaad u soo dhigatid ballan rugta dhallaanka iyo cunugga. Waxaa umulisada iyo takhtarkaba labadooda loo soo tabobaray inay sameeyaan baaristaan. Haddii aad jeceshahay waxaad u soo wadan kartaa qof ballankaaga. Haddii ay soo baxaan dhibaatooyin inta aad lee-dahay uurka, waxuu takhtarkaaga ama umulisidaada kuu gudbinayaan qof takhasus u leh.

Tegidda joogtada ah ee baarista waxay lee-dahay tiro faa'iidooyin ah. Caafimaadkaaga iyo dhallaankaaga aan weli dhalan labaduba waa lala soconayaa, waxaana lagu siinayaa warar iyo gacansiin. La socodka ka hor dhalmada waa bilaash.

Haddii ay naagta jeceshahay inaay iska soo tuurto 12 toddobaad ka dib, waa inay oggolaansho ka raadsataa guddiga takhaatiirta caafimaadka.

Wararka dheeriga ah:
www.trygdeetaten.no
www.fhi.no



– Wuxuu cunug kasto xaq u lee-yahay waxbarasho

Cutubka 3aad

Waxbarashada

Waxuu cunug kasto xaq u lee-yahay waxbarasho. Waxay waaliddiinta mas'uul ka yahiin inay u diraan caruutooda dugsiga. Waxuu cutubkaan ku siinayaa qaar ka mid ah wararka ku saabsan sida ay waxbarashada Norwejiyaanka ay u shaqaynayso.

Dugsiyada ee Norway

Waxaa ka jirro Norway 10 sanadood oo ah waxbarashada khasabka ah, oo micnaheedu yahay inay waaliddiinta geeyaan caruurtooda dugsiga iyo inay hubiyaan inay sameeyaan layligooda guriga. Kharashka waxbarashada hoose iyo tan dhaxe waa bilaash, buugagga dugsiga ee caruurta waxaa bixinaayo maamulka deegaanka. Waxay caruurta bilaabayaan dugsiga Agosto ee ah sanadka ay lix jirsanayaan.

Waa inay caruurta tagaan fasalada ee maaddo kasto. Waxa dhici karo in laga reebo caruurta qayb ka mid ah Aqoonta Masiixiga iyo manhajka Nidaamyada Anshaxa Waxbarashada (CKREE), haddii ay sidaas soo coodsadaan waaliddiinta. Caruurta dhigato sanadka koowaad iyo kan labaad waxay dugsiga dhiganayaan 4-5 saacadood maalintii. Sacadaha dugsiga la dhigto waa ka dheer yihiin caruurta ka da' wayn. Waa inay caruurta Norway guriga ka keensadaan baakadka qadada si ay ugu cunaan dugsiga. Dugsiga cunto ma bixiyo.

Waxaa caruurta laga soo siinayaa dugsiga layliga guriga sanadka koowaad. Waxay waaliddiinta mas'uul ka yahiin inay hubiyaan inay caruurtooda samaynayaan layliga guriga iyo inay ka caawiyaan. Caruurta dugsiga hoose iyo kan dhexe loo ma siinaayo wax darajooyin ah shaqadooda, laakin waxay barayaasha war celin qoran ka siinayaa waaliddiinta sida horumarinta ay u gaarayaan.

Waxay wiilasha iyo gabdhaha wada dhigtaan isku fasallo, waxayna wada dersaan dhammaan isku maaddooyin. Inta lagu jirro sanadka koowaad ee dugsiga waxay caruurta ku qaadanayaan maalin hal toddobaad waxbarasho dibedda. Waxaa sidaan lagu magacaabaa waxbarashada dibedda ka ah dugsiga. Inta badan sanadka ee Norway waa qaboob, oo la socdo roob, baraf iyo budada barafka. Waxaa sidaas darteed muhiim u ah caruurta inay soo qaataan dhar kulul, kobaha culus (boots) iyo roob-celiyaha. Waa inay xitaa iskaga beddelaan dharka dugsiga haddii ay qoyan yahiin.

Ku soo qoridda

Waa in cunug kasto lagu soo qoraa dugsiga deegaankiisa ka hor inta uusan bilaabin. Waxay dadka intooda badan helaan warqad loogu sheegaayo marka

Waxbarashada khasabka ah waa bilaash waxaana buugagga wax laga barto bixinaayo maamulka deegaanka. Waxay dugsilayda bilaabayaan dugsiga Agosto oo ah sanadka ay lix jirsanayaan.



Caruurta joogi doono Norway in ka badan seddax bilood waa inay waqti gaaban ku bilaabaan dugsiga imaanshaha dalka ka dib.

ay qorista la qabanaayo, laakin waxaa ogaysiis lagu soo daabacayaa wargaysyada deegaanka. Sanadka uu cunugga noqonaayo shan jir- oo ah had iyo jeer Sebtembar- waa inay waaliddiinta tagaan dugsiga waana inay dhammaystiraan foomka ku qorista.

Caruurta joogi doono Norway in ka badan seddax bilood waa inay waqti gaaban ku bilaabaan dugsiga ka dib imaanshaha dalka.

Xanaanada ka hor dugsiga (SFO)

Waxay dhammaan dugsiyada siiyaan nidaamka xanaanada ka hor dugsiga (SFO) caruurtaa aad u dhallin yar, halkaasi ay ku ciyaari karaan iyaga oo ay kor ka ilaalinayaan dad qaangaar ah. Waaliddiinta doonayaan inay caruurtooda tagto nidaamka xanaanada ka hor dugsiga (SFO) waxay bixinayaan bishiiba xoogaa lacag ah. Waxaa caruurta tegayo FSO la siinayaa cunto fudud.

Waalidiinta iyo dugsiga

Waxay waaliddiinta iyo dugsiga si wada jir ah uga wada shaqaynayaan inay ka caawiyaan in caruurto korto. Waxa labo jeer sanadkii dhammaan waaliddiinta lagu cusamyaa inay ka soo qaybgalaan inay la qaatan fadhi barayaasha.

Waxuu baraha hal mar sanadkii ku casumayaa waaliddiinta cunug kasto fadhi uu baraha ugu sheegaayo sida uu cunugga uga gaaraayo horumar dugsiga waxaana waaliddiinta la waydiisanayaa aragtiyadooda. Fadhiyadaan ka hor waxay caruurta waawayn qorayaan waxay ka jecel yahiin ama aysan ka jecleen dugsiga.

Waxay waaliddiinta soo waydiisan karaan waqti kasto inay la yeeshaan fadhi barayaasha cunugga haddii ay u baahan yahiin talo ama ay jecel yahiin inay kala hadlaan arrimo kale.

Caawinaadda luqadda

Waxaa la siin karaa caruurta dugsiga koowaad iyo kan sare-hoose ee Norway casharo dheeri ah, iyada oo lagu daraayo manhajka caadiga ah. Waxay dugsilayda baraayaan fahmidda, ku hadalka, akhriska iyo ku qorista Norwejiyaanka. Waxuu muhiim u yahay Norwejiyaanka barashada maaddooyinka kale.

Sidaas darteed waxay dugsiyo badan lee-yahiin fasallo gooni u ah dugsilayda aan ku hadlin Norwejiyaanka. Waxay dugsilayda dhiganayaan fasalladaasi waqti u dhexeeyo lix bilood ilaa labo sanadood. Waxaa halkaan diiradda lagu saarayaa barashada aasaasiga u ah Norwejiyaanka. Waxay dugsiyada kale si toos ah u gaynayaan dugsilayda fasallada. Haddii ay sidaasi noqoto waxa la siinayaa caawinaad badan oo dheeri ah ee luqadeed.

Waxaa loo gudbinayaa dugsilayda fasalka ka tarjumaayo da'dooda ay haatan jiraan haddii uu baraha aaminsan yahay inuu Norwejiyaankooda si fiican ugu filan yahay kaasi oo u fasaxaayo inay raacaan manhajka caadiga ah.

Markii lala yeesho wada tashi baraha, waxay waaliddiinta go'aan ka gaarayaan inuu Norwejiyaanka u noqdo cunugga luqaddiisa/eeda koowaad ama sida ka labaad. Waxaa dugsiloowga laga soo wareejin karaa Norwejiyaanka ah sida luqaddiisa labaad isag oo loo soo wareejinaayo fasallada Norwejiyaanka ee caadiga ah inta ay dhiganayaan dugsigiisa/eeda.

Baahida loo qabo baridda luqadda hooyo waa ugu wayn yahay markii cunugga ku baranaayo akhriska iyo qorista dugsiga. Si kastaba ha noqotee, baridda luqadda hooyo waa la gaarsiin karaa haddii ay jirto baahi loo qabo. Waxaa marmar dugsilayda lagu baraa luqaddooda hooyo maaddooyin kale. Markii ay jirto arrintaas waxuu cunugga dhiganayaa fasalka maaddada baraha isaga oo la jirro baraha luqadda hooyo, waxaana maaddada la baranaayo loogu tarjumayaa isla luqaddiisa/eeda hooyo.

Dugsilayda ku qabaan dhib inay ku hadlaan, ku akhriyaan iyo inay ku qoraan Norwejiyaan waxaa waxbarasho looga siin karaa xitaa dugsiga hooseare. Waxaa baridda luqadda hooyo lagu saa'idin karaa dugsiga caadiga ah ee maalinta waxaana lagu samayn karaa dugsi kale oo aan ahayn dugsiga ay caadi ahaan dugsiloowga u dhigto.

Dugsiga sare

Waxay dadka magangalyo-doonka ah oo ay da'dooda tahay 16-18 xaq u lee-yahiin inay isku qoraan dugsiga sare haddii ay soo dhammaystirteen 10 sanadood ee waxbarashada khasabka ah ama waxbarasho kale oo sare.

Waxay waaliddiinta caadi ahaan ka bixiyaan caruurtooda lacagta buugagga wax laga barto inta ay dhiganayaan dugsiga sare. Kuwa deggan xaruumaha soo dhowaynta magangalyo-doonka waxay ka coodsan karaan UDI, Iyaga oo soo maraayo xarunta soo-dhowaynta, in laga caawiyo maaliyadda lagu bixinaayo buugaggaas wax laga barto.

Waxay ardayda qaarkood u baahan karaan Inay ka bartaan luqad saa'id ah dugsiga sare. Waxay dugsiyada qaarkood sidaas darteed soo bandhigeen labo sanadood oo ah fasalka aasaasiga oo inta ay ku jiraan ardayda ka helayaan inay bartaan barashada saa'idka ah ee Norwejiyaanka iyo Ingiriisiga. Waxay kale ay sidaa u oggolaanaysaa inay u helaan waqti aad u badan ay ku darsadaan maaddooyin kale. Waxaad waydiisaa la-taliyaha waxii warar dheeri ah.

Waxay waaliddiinta caadi ahaan ka bixiyaan caruurtooda lacagta buugagga wax laga barto inta ay dhiganayaan dugsiga sare. Kuwa deggan xaruumaha soo dhowaynta magangalyo-doonka waxay ka coodsan karaan UDI, Iyaga oo soo maraayo xarunta soo-dhowaynta, in laga caawiyo maaliyadda lagu bixinaayo buugaggaas wax laga barto.

Wararka dheeriga ah:
www.ung.no
www.bip.no
www.nokut.no
www.vox.no

– Waxay tahay ujeeddada laga lee-yahay hab-bulshadeedka Norway in dadkeeda deggan la gaarsiiyo barwaaqo

Cutubka 4aad

Bulshada Norwejiyaanka

Waxaad Cutubkaan ka akhrisan kartaa sida ay bulshada Norwejiyaanka u shaqayso. Waa ka duwanaan kartaa dalkaaga. Waxaa muhiim ah in dhammaan xubnaha bulshada ay yaqaannaan waxyaabahaan dhab ahaan muhiimka ah.

Demoqaraadiyadda

Norway waa dal demoqaraadi ah. Waxay micnaheedu tahay in qof kastou lee-yahay xaq inuu codeeyo kuna caawiyo go'aaminta qofka xukumaayo dalka.

Waxaa barlamaanka Norwejiyaanka lagu magacaabaa Storting. Waxay xubnaha ku jiro Stortin wakiilo ka yahiin xisbiyo siyaasadeed ee kala duwan.

Waa in xukuumadda isku soo raacaan Storting. Norway waa boqortooyo dastuuri ah. Waxuu Boqorka madax u yahay dowladda, laakin ma laha awood siyaasadeed.

Waxay Norway lee-dahay hab leh labo heer ee xukuumadda deegaanka. waxaa doorashooyin loo qabanayaa xulashada wakiilada gobolada Golayaasha gobolka iyo Goloyaasha Degmooyinka deegaaneed. Waxay dhammaan muwaadaniinta ka wayn 18 jir xaq u lee-yahiin inay ugu codeeyaan doorashooyinka guud (ee Storting), laakin codaynta ma aha khasab.

In kastoo xitaa aadan ahayn muwaadan Norwejiyaan ah waxaad xaq u lee-dahay inaad uga codaysid doorashooyinka Golaha Gobolka iyo Golaha Degmada, laakin waa inaad ahaataa degganaha Norway seddaxdii sanadood ee ka horeeyay maalinta doorashada.

Dastuurka

Dastuurka waa sharciga ugu muhiimsan ee Norway. Waxuu qayaxayaa qofka xukumaayo dalka iyo sida loo xukumaayo. Waxaa kale uu Dastuurka qayaxayaa xuquuqda aasaasiga u ah kuwa ku nool Norway.

Qaybinta awoodda

Gudaha Norway, waxay awoodda u qaybsan tahay oo ay u dhexaysaa seddaxda hay'adood: Stortin (barlamaanka) ee soo saaro sharciyada, Xukuumadda oo fulinayso sharciyadaasi, iyo Caddaaladda (maxkamadaha) ee xoojinaayo sharciga. Waxay awoodda u sii kala qaybsan tahay seddax laamood si ay midba midda kale u saarto miisaanka iyo si loo hubiyo in mid ka mid ah laamaha xukuumadda aysan ugu takri-falin awoodaheeda si ay uga faa'iidaysato.

Nidaamka sharciga

Qofna ma la dhigi karo xabsiga xukun la'aan. Waxay sharciga iyo nidaamyada sugayaan in xuquuqda dadka deggan

Waxay sharciyada iyo nidaamyada sugaayaan in la dhowro xuquuqda dadka deggan Norway. Waxay sharciyada qayaxayaan waajibaadka qof kasto ee deggan Norway. Qofna ma loo tixaabi karo xabsiga xukun la'aan.

Norway la dhoowr. Waxay sharciyada qayaxayaan waajibaadka qof kasto ee deggan Norway. Maxkamaha keliya ayaa leh awoodda lagu ciqaabaayo dadka. Waxaana lagu magacaabaa nidaamka sharciga.

Xuriyadda hadalka

Waxay xuriyadda hadalka muhiim u tahay demoqaradiyadda. Waxuu micnaha xuriyadda hadalka yahay in qofna loo cadaadin karin waxuu sheegaayo ama ku fikiraayo. Waxuu qof kasto xaq u lee-yahay inuu sheego aaraadiisa ku saabsan xaaladaha bulshada.

Waxaa ka jiraan Norway in ka badan hal boqol oo wargaysyo ah, sidaasi oo kalena waxaa jirro qanaaddada telefishanka iyo radiyaha. Waxay saxafiyiinka had iyo jeer cambaareeyaan xukuumadda, hay'adaha danta guud iyo dadka awoodda ku leh Norway. Warbaahinta madax banaan waxay muhiim u tahay demoqaradiyadda.

Xuriyadda diinta

In kasto oo ay Kiniisadda ay tahay Kiniisadda rasmiga ka ah Norway, waxuu qof kasto xaq u lee-yahay inuu isticmaalo diintiisa. Waxuu micnaha xuriyadda diimeed yahay xitaa xaqqa ah inuu qofna aaminin diinta. Waxay diinta ku lee-dahay raad yar nolosha siyaasadeed iyo tan bulshadeed ee Norway. Waxay dad badan u haystaan inay diinta tahay arrin gaar u ah qofka.

Sinaanta iyo xuquuqda loo siman yahay

Ma laga oggolo Norway in qof loo takooro sababta ah lab iyo dhiddig, jinsiga, diinta ama dhinaca galmada. Dumarka iyo ragga waa isku mid waana in laga siiyaa xuquuq simaan dhammaan qaybaha bulshada.

Micnaha sinaanta labka iyo dhiddiga waa in dumarka iyo ragga ay ku lee-yahiin isku fursado, xuquuq iyo waajibaad guriga, goobta shaqo, siyaasadda iyo meel kasto oo ay lee-dahay bulshada.

Barwaaqaynta dowladda

Waxay dowladda Norwejiyaanka sugaysaa in qofna u silcin ama uusan waynin waxbarasho, daawayn, dhar uu xirto ama guri. habka sidaan ah waxaa lagu magacaabaa barwaaqaynta dowladda.

Waxay maamulada deegaanka iyo xukuumadda dhexe u qoondhaynayaan lacag dugsiyada, isbitaalada, dhisidda waddooyinka, hawlgabka, adeegyada bulshada iyo danaha kale. Waxay lacagta ka timaadaa canshhurta tooska ah iyo tan ay bixiyaan dadka deggan dalka. Mar kasto oo wax gadanaysid, qayb ka mid ah inta aad bixisay waxaa loo gudbinayaa dowladda. Waxay kale ay dowladda ka heshaa lacag soo-saarka salidda iyo waxqabadyada ay sameeyaan maharadaha kale. Waxay dowladda Norwejiyaanka lee-dahay shirkado badan oo muhiim ah.

Canshuurta

Waxuu qof kasto ee joogo Norway ka bixiyaa canshuur waxa soo galo. Dadka ay soo galaan wax aad u badan waxay bixiyaan canshuurta ugu badan, sidoo kale kuwa ay soo galaan wax aad u yar waxay bixiyaan canshuurta ugu yar. Waxay soo ururinta canshuurta awood u siinaysaa xukuumadda inay nagu siiyaan adeegyada kala duwan ee barwaaqaynta. Tusaale ahaan, xarunta soo-dhowaynta magangalyo-doonka ee aad ku nooshahay, dugsiga ay caruurtaada tagaan iyo isbitaalka aad ka heshid daawaynta oo dhammaantood laga bixiyo canshuurta uu qof kasto ka bixiyo Norway.

Sababta oo ah In lagu bixiyo canshuurta adeegyada danta-guud oo qof kasto ka faa'iidaysanaayo, waxaa muhiim ah in qof kasto ay soo gasho lacag ku biiriya qaybtiisa isaga oo bixinaayo canshuurta. Haddii aadan bixin canshuurta lagugu lee-yahay, waa lagu ganaaxayaa, waa laguu xiraayaa ama waxaad bixinaysaa qiimaha canshuurta oo ciqaab ah.

Si aad uga heshid shaqo Norway waa inaad haysataa lambarka aqoonsiga ee shakhsiga ah ama fasaxa shaqada

Norwejiyaanka. Waxaa lagu siinayaa lambarka aqoonsiga shakhsiga haddii lagu siiyay fasaxa degganaanta. Waa inaad heshaa oo kale kaadhka canshuurta haddii aad ka qabanaysid shaqo mushahar leh Norway. Waxuu kaadhka tilmaamayaa inta ay la egtahay canshuurta laga jaraayo mushaharkaaga. Waxaad kaadka canshuurta ka heli kartaa xafiiska canshuurta ee degaankaaga.

Ma laga qaadaayo canshuur mushaharka haddii waxa ku soo galo oo aad ka qaadatid shaqo-bixiye kasto ay ka yar tahay NOK 1,000. Waa inaad ka bixisaa oo kale canshur waxa ku soo galo inta aad ka qaybgelaysid Nidaamka Soo-bandhigidda (fiiri cutubka 7aad). Waa inaad la soo socodsiidaa xaruntaada soo-dhowaynta haddii aad heshid shaqo oo aad qaadanaysid lacag.
Waxuu xafiiska canshuurta deegaankaaga kuu sheegi karaa wax intaa ka badan ee ku saabsan ka shaqaynta iyo canshuurta Norway.

Xuquuqda caruurta

Waxay caruurta lee-yahiin xuquuq cad oo muhiim ah. Waxay xaq u lee-yahiin cunto, guri, xanaanada caafimaadka, dhar iyo waxbarasho. Waxay lee-yahiin xaq ay ku fikiraan ayna ku rumaystaan waxay doonaan iyo inay ka helaan caawinaadda ugu fiican ay ka heli karaan bulshada. Caruurta waxay xaq u leeyihiin in la dhegaysto markii ay ka hadlaayaan arimaha waxyeleen u leh. Culayska la saraayo wuxuu cunugga sheegaayo wuxuu u barbardhigma da'da iyo baluuqnimadiisa. Dawladda Norway waxay ma'suul ka tahay in xuquuqda caruurta la eego. Xukumada waa Inay ka difaacda caruurta aflagaado ama dhib kasto.

Caruurta aan la joogin qooysaskooda waxay xaq u lee-yahiin badbaadin iyo caawinaad dheeri ah. Waxay dowladda caawinaysaa caruurta magangalyo-doonka ah waxayna ka shaqaynaysaa si isugu wada keeni lahayd qooysaskooda.

Korinta

Waxay waaliddiinta u korinayaan caruurtooda si ay ugu xanaaneeyaan cunugga danahiisa iyo baahidiisa.Waa in caruurta la baro sida ay bulshada Norwejiyaanka u shaqayso. Waxaa kale oo la barayaa caruurta inay fahmaan micnaha xuquuqda bani'aadamka iyo sinaanta. Waa sharci-darro in la la garaaco caruurta ama in si kale oo jir dil ah lagu ciqaabo, iyada oo loo eegin sababta. Waxaa kale oo sharci-darro ah in maskax ahaan loo xumeeyo cunugga.

Caruurta iyo shaqada

Ma la oggolo in caruurta ka yar 12 jir ay qabtaan shaqo mushahar leh. Ka dib markii ay soo wareegatay seddax iyo toban sanadood malinta dhalashadooda, waxay caruurta qaban karaan shaqo fudud, tusaale ahaan, inay qaybiyaan wargaysyada. Waa in shaqadu aysan waxyeelaynin nabadgelyadooda, caafimaadkooda ama horumarkooda, waana in shaqo kasto uusan wax u gaysan layligiisa/eeda dugsiga.

Adeegga barwaaqo-siinta caruurta

Waajibka Adeegga Barwaaqo-siinta Caruurta waxuu yahay in lagu caawiyo caruurta ku jirto xaalad dhibban. Gudaha Norway. Gudaha Norway, waxuu Adeegga Barwaaqo-siinta Caruurta soo faragashan karaa haddii ay dareensan yahiin in cunugga uu ku jirro halis. Waxay caadi ahaan Xafiisyada Barwaaqo-siinta Cunugga siinayaan waaliddiinta tusaale ay awood ugu yeelanayaan inay la socdaan caruurtooda.

Markii ay jiraan arrimo aad u xun, oo ah markii caafimaadka cunugga ama nabadgelyadiisa ay ku jiraan halis, waxuu Adeegga Barwaaqo-siinta Cunugga u dhiibi karaa qooys hayo ama waxaa la geeynayaa guriga caruurta. Waxay ujeeddada tahay in cunugga si fiican loo xanaaneeyo, iyada lala dejinaayo waaliddiintiisa/eeda ama ay xanaanaynay-



aan Adeegga Barwaaqo-siinta Cunugga. Waxaad waydiisa hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta haddii aad qabtid wax su'aalo ah ee ku saabsan Adeegga Barwaaqo-siinta Cunugga.

Nolosha qooyska

Dadka joogo Norway waxay la noolaan karaan qofkii doonayaan markii ay ka wayn yahiin 18 jir. Waxay dad badan nool yahiin keligood. Dadka qaarkiis waa waaliddiin keligood ah, waxay qaar la nool yahiin lamaanaha ay isku yahiin isku galmo, inta kuwa kalena ay la nool yahiin saaxibo. Waad guursan kartaa ama waxaad iskaga diiwaan gelin kartiin maamulada sida lamaanayaal- ama isla noolaan kartaan keliya. Lamaanayaasha qaniisyada ah ee Norway waxay u wada noolaan karaan iyaga oo si-diiwaan gelin ama si lamaanayaal diiwaan gashan.

Guurka

Si ay isu guursadaan nin iyo naag waa inay ahaadaan 18 jir.. Waxuu qof kasto xaq u lee-yaha inuu xusho qofka uu guursanaayo. Qof kasto oo joogo Norway ma lagu khasbi karo ama ma lagu cadaadin karo inuu guursado, mana loo diri karo caruurta inay ku soo guursadaan dal uu guurka khasab yahay. Haddii uu guurka ahaa mid ku dhacay cadaadis, markaa ma la oggolaan doono inay qooyska isu yimaadaan. Waxaa kale oo looga dhawaaqi karaa Norway inuu guurkaasi khasabka ah waxba ka jirin. Waxaa la furayaa dacwadda ah in muddo aan ka dambayn lix bilood ka dib la baabi'yo guurka khasabka ah markii uu dhaqan galay.

Waa ka dembi Norwayn in la guursado hal qof ka badan. Waa dembi ciqaab leh haddii aad horay u guurasatey oo aan guurkii hore la soo baabi'inin.

Furiinka

Waxay rag iyo dumar labaduba xaq u lee-yahiin inay is-furaan. Haddii uu midkood uusan sii doonayn in laysa sii qabo, isaga/iyada waa inay si caadi ah marka koowaad u soo waydiisataa in la kala joogo (waqtiga sugitaanka ka hor intuusan furiinka dhammaan). Markii ay lamaanayaasha ay kala joogeen ugu yaraan hal sano, dhinac ayaa soo waydiisan karo furiinka. Ma wada noolaan karaan lamaanayaasha waqtiga kala joogista. Haddii ay lamaanayaasha wada noolaayeen ugu yaraan labo sanadood, waxay dhinacyada soo waydiisan karaan furiin iyada oo lagu xisabtamin waqtiga kala joogista. Haddii ay lamaanayaasha is furaayo ay isu lee-yahiin caruur, waa inay tagaan fadhiyada talosiinta ee qooyska ka hor inta aysan soo coodsan furiinka.

Ma aha suurto gal inay maxkamadda amar ku soo saarto baabi'inta guurka iyada oosan jirin waqtiga kala joogista haddii midkood oo dhinaca kale u gaystay xumaan ama isku dayay inuu dilo, ama ku handado dagaal iyo faro-xumayn.

Dagaalka

Ma laga oggolo Norwy in loo gaysto dagaal iyo handadaad oo lid ku ah xubnaha qooyska. Ka akhriso waxyaabo dheeri ah ee ku saabsan Cutubka 5aad. Waxaa jiraan inay dalka ku baahsan yahiin 50 hooy oo loogu talogalay dagaalada guriga ka dhacaan. Waxay hooy aqbalaan dumarka iyo caruurta oo jir ahaan la soo waxyeeleeyay oona dareensan handadaadyo. Ma u baahnid inaad soo waydiisato gabood ama aad la soo xiriirtid mid ka mid ah hoyga.

For more information:

www.krisesenter.com
www.skatteetaten.no
www.bufdir.no



– Waa muhim in la garto sida loo socodsiiyo arrimaha magangalyo-doonka



Tilaab-tilaab socodsiinta magangalyada

1

Waxaad imaanaysaa Norway waxaadna booliska isku diiwaan gelinaysaa sida qof ah magangalyo-doon.

2

Waxaa lagu gaynayaa xarunta ku meel gaarka.

3

Waxaa waraysi kula yeelanaayo Agaasinka Soo-gelootiga Norweji-yaanka (UDI).

4

48

Codsiyada magan-galyada ee loo ma-laynaayo inaay asaasi lahayn waxaa lagu socodsiinayaa 48 saa-cadood gudahood.

5

Waxaa lagu gaynay-aa xarun kale oo ku meel gaar ah ama xarunta caadiga ah ee soo-dhowaynta.

6

Waxaa la eegayaa coodsigaada. Dherirka waqtiga loo baahan yahay in lagu socodsiiyo coodsiyadaas waxay arrinba arrin ayay uga duwanaan kartaa.

7

Codsiyada caruurta aan lala socon waxaa wax loo-ga qabanayaa si degdeg ah intii suurto gal ah.

8

Waxaa lagu la soo socodsiinayaa go'aanka. Haddii lagu siiyo fasaxa degganaanta. Howsha lagu raadinaayo munishiibiyada oggolaanayso Inay ku dejiso ayaa bilaabanayso. Haddii la diido coodsigaada, si kastaba ha noqotee, waxaad ka qaadan kartaa racfaan ama waxaad dib ugu laabanaysaa dalka.

Waxaad u baxaysaa inaad ku noolatid mid ka mid ah munishibiyaasha dalka.

a

b

Haddii la soo diiday coodsigaada, waxaad ka qaadan kartaa go'aanka racfaan. Waa inaad ku keentaa racfaanka muddo aan ka dambaynin seddax toddobaad ka dib markii lagu soo gaarsiiyay diidmada. Waxaa kaa caawinaayo qareenka inaad ka qaadatid racfaan.

Haddii ay ku adkaysato UDI diidmadeeda markii ay eegtay racfaankaaga, waxaa racfaankaaga loo gudbinayaa Guddiga Racfaanka ee Soo-gelootiga (UNE). Waxuu caadi ahaan ku gaarayaa go'aan 10 bilood gudahood.

Haddii uu UNE soo diido racfaankaaga, waa go'aanka ugu dambeeyo waana inaad dib uga laabataa dalkaaga. Waxaa arrintaada soo hordhigi kartaa maxkamadaha, laakin waa inaad iska bixisaa kharashka sharciga.



– Waxaa dhammaan coodsiyada magangalyada lagu socodsiiyaa sida ay qabaan isla sharciyada

Waxaa muhiim ah inaad ogaatid waxa kugu dhacaayo inta la socodsiinaayo codsigaaga.

– Waxaa muhiim ah in la garto shuruucda Norwejiyaanka si aan loo jebinin

Cutubka 5aad

Garashada sharciga

Waxuu dal kasto lee-yahay shuruuc ah inay dadkiisa deggan u hoggaansamaan. Waxay sidaan muhiim u tahay nabadgelyada qof kasto.

Waxuu qof kasto oo joogo Norway u baahan yahay inuu ogaado waxii sharci ah iyo waxii sharci-darro ah. Markii aad joogtid Norway waa inaad u hoggaansantaa sharciga. Waxay sharuucda qaarkood ee Norway ka duwan yahiin kuwa dalalka kale. Waxaa lagugu xukumi karaa dembi xitaa haddii aadan aqoon inaad jebinaysid sharciga Norwejiyaanka. Waxaa sidaas darteed muhiim ah inaad garato shuruucda intooda badan.

Gudaha Norway, waxuu sharciga ka horeeyaa diinta iyo caadada. Waxay micnaheeda tahay inaad u hoggaansantid sharciga Norwejiyaanka xitaa haddii u lid ku yahay caadada aad ku soo dhaqantay. Ma uga dhigi kartid sabab fal sharci-darro ah adiga oo ku magacaabaayo inuu yahay caado ama fal diimeed.

Haddii aadan hubin waxa ku saabsan arrinta inuu ka yahay sharci ama sharci-darro Norway, waxaad waydiisaa hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta. Waxay hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta si intaa ka badan kuugu micnaynayaan waxa ku saabsan shuruucda Norwejiyaanka sida qayb ka mid barnaamajka wararka.

Booliska

Waxay booliska lee-yahiin shaqooyin badan. Waxay ka hortagaan dembiga waxayna dhoowraan nabadda. Waxay kale ay ku difaacaan dadka gudaha xuduudaha dalka.

Dadka Magangalyo-doonka ah iyo dembiga

Haddii aad ku jebisid sharciga gudaha Norway inta aad tahay magangalyo-doon, waxuu UDI u socodsiinayaa si degdeg ah coodsigaaga. Haddii la soo diido coodsigaaga waxaa dalka lagaaga dhoofinayaa si xoowli. Waxaa kale oo dhib noqonayso inaad ku soo gasho Norway iyo dhoowr ah dalalka yurub taariikh dambe.

Waxuu sharciga ka horeeyaa diinta ama dhaqanka. Waxay micnaheedu yahay in qof kasto uu u hogaansamo sharciga Norwejiyaanka xitaa haddii uu ka hor imaanaayo dhaqanka aad horey u isticmaali jritay.

Haddii aad jebisid sharciga waxaa lagu hor gaynayaa maxkamadda. Haddii lagugu helo laguna soo xukumo dembi ciqaabeed aad u xun, waxaa lagugu xukumi karaa sanooyin badan oo xabsi ah iyo/ama ganaax wayn.

Waa sharci-darro in la sameeyo caddayn been-abuur ah ama la soo bandhigo dokumenti been-abuur ah oo xiriiri la leh coodsiga magangalyada. Dadka Magangalyo-doonka ee la soo diiday coodsiyadooda waa inay ugu baxaan dalka muddada loo cayimay. Haddii ay sidaasi yeelin, waxaa soo qabanaayo booliska, waa la xirayaa waxaana la gaynayaa xarunta suga ee dhoofinta ka hor inta dib looga dhoofin dalka.

Ciqaabta

Haddii aad jebisid sharciga , waxaa lagu horgaynayaa maxkamad. Haddii lagugu helo dembi oo lagugu xukumo dembi ciqaabeed ee aad u xun, waxaa lagugu xukumi karaa sanooyin badan oo xabsi ah iyo/ama ganaax wayn ayaa lagugu qaadi karaa.
Ciqaabta ugu badan Norway waa 21 sanadood oo xarig xabsiyeed ah. waxaa ciqaabta ugu wayn lala xiriiri karaa dembiyada muqaadaraadka iyo dilalka aad u xun. Ma laha Norway ciqaabta dilka.

Noocyada kala duwan ee dembiga

Takoorka

Waxuu micnaha takoorka yahay in loo la dhaqmo qof si aad uga xun kuwa kale sababta oo ah labnimada iyo dheddignimada, jinsiyadda, jinsiga, diinta, midabka jirka, curyaanimada ama dhinaca galmada.

Haddii laguu la dhaqmo si aad uga xun kuwa kale sababta oo ah asalka jinsigaada, waxaad u tahay dhibbane midabtakoor. Waa ka sharci-darro Norway, laakin waxuu ka dhici karaa dukaamada, goobta-shaqo ama meel kasto ee bulshada. Waxuu kale uu takoorka ka dhici karaa xaruntaada soo-dhowaynta magangalyada.

Waxaad xaq u lee-dahay inaad sheegtid in lagugu sameeyay takoor kana qaadatid tilaab lid ku ah dhaqankaas. Haddii aad u tahay dhibbane midabtakoor ama takoorid wayn, waxaa lagu qaadayaa dembiilayaasha dacwad. Waxay kuu sheegayaan hawlwadeenada joogo xaruntaada soo-dhowaynta magangalyada wax intaa ka sii badan oo ka ah qayb barnaamajka wararka.

Dagaalka iyo hanjabaadda dagaalka

Istimaalidda dagaalka iyo in loo gaysto dhaawac jireed qof waa ka sharci-darro Norway. Waxaa sidaan oo kale lagu la



dhaqmayaa xubnaha qoyska. Waxaa kale oo sharci-darro ah in loo gaysto qof hanjabaad dagaal leh. Waxuu kale sharciga si gaar ah culays u saarayaa dagaalka loo gaysanaayo dumarka iyo caruurta. Dagaalka gudaha iyo dibedda qooyska labaduba waa sharci-darro.

Kufsiga/ faro-xumaynta galmada

Kufsiga waa dembi aad ugu xun Norway. Waxaa kale dembi ah kufsiga dadka is-qabo. Kufsiga ma laha cududaar, iyada oo loo eegayn sida uu dhibbanaha u lebisnaa ama u dhaqmaayay. Dadka lagu xukumey kufsiga waxaa loo tixaabayaa xabsiga.

Da'ad galmada la ogol yahay

Waa ka sharci-darro Norway in lala yeesho galmo qof ka yar 16 jir, xitaa haddii ay labada dhinac is-oggol yahiin. Waxuu qof kasto mas'uul ka yahay inuu ogaado in lamaanahiisa galmada uu ka wayn yahay 16 jir.

Kuwa aan isgaynin

Xiriirka galmada ee lala yeelanaayo xubnaha qooyska (tusaale ahaan waalidiinta, caruurta, walaalaha, awoowayaasha iwm) ma is-geeyaan. Waa ka mamnuuc isu-tegiddaas Norway.

Naafaynta xubinta taranka (dhalmada)

Waxuu gudniinka dumarka si xoog leh mamnuuc uga yahay Norway. waxaa dhammaan noocyada gudniinka dumarka, uu ku jiro gudniinka "sunnada" inay yahiin naafaynta xubinta taranka. Waa sharci-darro in loogu khasbo qof, la oggolaado ama laga qaybqaato naafaynta xubinta tarmada ee gabdhaha ama dumarka. Naafaynta xubinta tarmada waxay keenaysaa ciqaabta ugu badan oo ah 8 sanadood oo xabsi ah. Waxaad ka sii akhrisan kartaa wax inta ka badan Cutubka 2aad. Waxay hawlwadeenada xaruntaada soo-dhowaynta magangalyada kaa siin karaan warar badan ee ku saabsan sharcigaan.

Cudurada laysku qaadsiiyo galmada

Haddii aad ogtahay inaad qaaday cudurka laysku qaadsiiyo galmada oo aad weli sii qaadsiinaysid kuwo kale cudurkaan, waa lagugu soo dacwayn karaa. Haddii aad shaki kaaga jirro inaad qabtid iyo inkale cudurka laysku qaadsiiyo galmada, waa inaad kala tashataa takhtarka. waxay takhaatiirta ku khasban yahiin inay dhoowraan sirta dadkooda jirran waxaad arrinta ka akhrisan kartaa Cutubka 2aad.

Takoorka waa ka sharci-darro Norway. Haddii aad tahay dhibbanaha takooridda jinsiga ama takooridyo kale oo wayn, dembiilayaasha gaystay waxaa lagu soo oogi karaa dacwad.

Ma lagu ciqaabi karo caruurta dharbaaxyo, laad (haraanti) ama nooc kale ee dagaal. Dhammaan ciqaabta jireed iyo maskaxeed ee caruurta waa sharci-darro waxayna keeni karaan xukunka xabsiga.

Guurka khasabka ah

Qof kasto oo joogo Norway kana wayn 18 jir waxuu xaq u lee-yahay inuu iskiis u go'aansado qofka uu gbuursanaayo. Waxay micnaheedu tahay in qofka ku nool Norway lagu khasbi karin innu galo guur lid ku ah rabitaankiisa- ha ahaato gudaha Norway ama dibedda. Waxuu qof kasto xaq u lee-yahay inuu iskiis u go'aansado haddii uu doonaayo furiin.

Waxuu guurka ka yahay diimo badan muqaddas, sidaasi oo yahay, waa in sharciga loo hogaansamaa, xitaa haddii ay nidaamyada hiddaha ama dhaqamada diimeed ay ka duwan yahiin. Ka akhriso wax intaa ka sii badan Cutubka 4aad.

Xumaanta loo gaysanaayo cunugga

Ma looga ciqaabi karo caruurta dharbaaxyo, laad (haraanti) ama noocyo kale oo ah dil gudaha ama dibedda guriga. Dhammaan ciqaabta jireed iyo maskaxeed ee carruta waa sharci-darro waxaana lagu soo oogayaa dacwad dembiilyaasha. Si xoog leh ayay u tahay mamnuuc faraxumaynta galmada ee loo gaysanaayo caruurta waxayna dembiyada noocaas ah keenayaan xabsi waqti dheer leh.

Waa soo farogashan kartaa Adeegga Barwaaqosiinta Caruurta haddii ay dareensan tahay inuu cunugga ku jirro halis. Waxaad la soo socodsiin kartaa Adeegga Barwaaqosiinta Caruurta haddii aad ogtahay in cunug ku jirro halis. Caadi ahaan waxay saraakiisha barwaaqaynta caruurta siiyaan waalidiinta tusaalooyin ay kula socon karaan caruurtooda. Ka akhriso wax inta ka badan Cutubka 4aad.

Hubka

Waa sharci-darro in la qaato qoryo, mindiyo ama hub kasto oo kale, xitaa haddii ay ujeeddada tahay in laysku difaaco. Waxaa isla sidaas lagu dhaqayaa qoryaha, daran-dooriga u dhaco, qalabka caruurta ku ciyaarto, qoryaha hawada leh iyo waxyaabaha kale oo u ekaan karo qoryaha. Waa mamnuuc in la gato ama la iibsado hub haddii aan laga haysan fasaxa gaar ah maamulada Norway.

Aalkolka

Waa ka sharci in aalkolka (khamriga) looga isticmaalo meel kasto oo ka mid ah Norway. Waa sharci-darro in la wado gaari adiga oo cabsan aalkol.

Maandooriyayaasha

Gedidda, haysashada iyo ku isticmaalidda dhammaan noocyada maandooriyayaasha si xoog leh ayay sharci-darro uga yahiin gudaha xuduudaha Norway. Khaadka, xashiishka iyo kanabiska/marijwaanada, oo ka noqon karaan sharci dalal kale qaarkood, waxay yahiin maandooriyayaal sharci-darro ka ah Norway.

Kontorobaan

Ma la oggolo in alaab lagu soo geliyo si sharci-darro ah dalka. Dhammaan gadashada iyo iibka alaabta kontorobaanka ah waxay keeni karaan in dacwad la soo oogo. Waxaad si shakhsi mas'uul uga tahay inaad hubisid inaadan gadan alaab kontorobaan ah.

Tuugonimada iyo gacan ku haynta alaabta la soo xaday

Waa ka mamnuuc xatooyada Norway. Waxaa kale oo sharci-darro ah in la gato ama la iibsado alaab uu soo xaday qof kale.

Dhillaysiga, isugaynta iyo dad soo gelinta

Waa sharci-darro in la gato ama la iibsado qof kale oo ah bani'aadam. Waxaa kale oo sharci-darro ah in loo kireesto dad ujeeddo ah dhillaysi ama in lagu caawiyo dhillaysi.

Haddii aad tahay dhibbanaha falalkaas, waxaad heli kartaa caawinaad aad uga baxdid. Kala hadal hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta magangelyada haddii uu qof kugu khasbaayo ama isku dayaayo inuu kugu khasbo dhillaysiga. Waxaad kale u sheegaysaa UDI xaaladdaada

Kala hadal hawlwadeenada xaruntaada soo-dhowaynta magangalyada haddii aad ogtahay in qof lagu khasbaayo ama laysku dayaayo in lagu khasbo dhillaysi. Waxaad kale oo aad u sheegtaa UDI waxa ku saabsan xaaladdaada.

Waxii warar dheeri ah:
www.politiet.no
www.lovdata.no



– Haddii la diido codsigaada racfaanka ugu dambeeyo, waa inaad markaa u noqotaa dalkaaga. Waxaad caawinaad waydiisan kartaa IOM.

Cutubka 6aad

Dib ugu laabasahada dalka (guriga)

Haddii ay diidmada codsigaada magangalyada tahay ugu dambayn, waxaad dhuminaysaa xaqqa aad ku joogaysid Norway. Waxuu Cutubkaan ku siinayaa wararka ku saabsan tilaabooyinka aad qaadaysid haddii aad heshid diidmadaas.

Waxuu codsiga magangalyada gelayaa jawaab ah HAA ama MAYA. Waxaa dad badan oo magangalyo-doon ah loo diiday fasaxa ay ku joogaan Norway waxayna dib uga labanayaan dalka.

In la soo diiday codsigaaga magangalyo waxaa loo dareemi karaa caddaaladdarro. Waxay dad badan u haystaan inay qabaan sabab macquul ah oo aad u fican in loo oggolaado inay joogaan Norway. Waxaa dhici karto inaad ka soo tagtay gurigaaga iyo hantidaada si aad ugu qaxdo Norway. Laakin haddii la soo diiday coodsigaaga, waxay micnaheedu tahay in maamulada Norwejiyaanka aysan aaminsanayn inay jiraan sababo fiican ee lagugu siiyo magangalyo.

Haddii aad heshid diidmada ugu dambayso ee codsigaaga magangalyada, waxay maamulada kaa sugayaan inaad dib ugu laabatid dhulkaaga hooyo. Waxaa caadi ahaan waajib kugu ah inaad uga baxdid 2-3 toddobaad gudahood markii aad heshid la socodsiinta diidmada ugu dambayso.

Waxaa muhiim ah inaad adiga iyo qooyskaaga u diyaar ahaataan inay suurto gal noqon karto diidmadaas u dambayso idinka oo ogsoon waxaad markaa ka dib samayn laheydeen. Waa inaad haysataa aragti dhab ah ee ku saabsan fursadaha in lagu siiyo magangalyo. Haddii aad la timid caruur Norway, waxaa si gaar muhiim u ah inaad u micnaysid waxa dhici karo haddii aad ku guul-darraysato codsigaaga.

Diidmada

Haddii la soo diido codsigaaga magangalyo, waxaa laguu qabanayaa qareen. Waxaad xaq u lee-dahay inaad

Haddii coodsigaaga la soo diido, waxaa laguu qabanayaa qareen. Waxaad xaq u lee-dahay inaad ka qaadato racfaan lid ku ah go'aanka laguugu soo diiday coodsigaaga. Waxuu qareenka kaa cawinayaa samaynta racfaankaaga.

Inaad ku socdaasho IOM waa bilaash. Waxaad kale oo lagu siinayaa caawinaad aad ku heshid dokumentiga socdaalka iyo tikidhka diyaaradda.

ka qaadato racfaan lid ku ah go'aanka lagu diidan yahay coodsigaaga. Waxuu qareenkaaga kaa caawinayaa samaynta racfaankaaga. Ka akhriso wax intaa ka sii badan Cutubka 1aad.

Dib ugu laabashada dalka

Haddii la gaaray go'aanka ugu dambeeyo ee diidmada coodsigaaga, waa inaad ka baxdid Norway. Waxaa lagugu casumayaa fadhi aad la qaadanaysid hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta magangelyada. Waxay kuu sheegayaan fursadaha kuu furan bacdamaa haatan ugu dambayntii la soo diiday coodsigaaga.

Waxaad ka codsan kartaa Ururka Caalimiga ah ee Socdaalka (IOM) inuu kaa caawiyo kaana siiyo kaalmo maaliyadeed socdaalkaaga dib u noqoshada. Waxaa lagu siinaaya caawinaadda haddii aad dalkaaga hooyo ugu noqonaysid si raalli ah.

Waxuu IOM kugu caawinayaa helitaanka dokumentiga safarka. Inaad ku socdaashid IOM waa kharash bilaash ah.

Faa'iidada ka codsiga IOM kaalmo waxay tahay in dhammaan kharashka lagaa bixinaayo, waxaana lagu siinayaa caawinaad aad ku heshid dokumentiga dhoofka iyo tikidhka diyaaradda.

Waa inaad ka coodsataa IOM kaalmada ka hor intuusan dhicin waqtiga laguu qabtay si aad ugu laabatid dalka. Waxaad kala hadashaa hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta magangalyada.

Dhoofinta khasabka ah

Haddii aad sii joogtid Norway ka dib taariikhda lagaa rabey inaad ugu laabatid dalka, waxaa arrintaada gacanta loo gelinayaa booliska. Waxaa dalka lagaaga saarayaa si xoog ah haddii adiga oo raalli ah uga bixin. Markii ay jirto dhoofinta khasabka ah, waxaad

lagaa doonayaa inaad siidid kharshka dhoofinta maamulada. Waaa in la bixiyaa kharashyadaan ka hor inta aan laguu oggolaan inaad dib ugu laabatid dalka.

Kaalmada maaliyadeed markii dib loo noqonaayo

Haddii lagu siiyay fasaxa joogitaanka gudaha Norway, laakin aad weli aad doonaysid inaad dib ugu laabatid dalka, waxaad u qalmaysaa in lagu siiyo kaalmo maaliyadeed (Gacasiinta Dib u noqoshada). Waxaa u sii dher gacansiintaan, in maamulada Norwejiyaanka kaa bixinayaan kharashka socdaalka.

Ma u mudnaanaysid gacansiintaan haddii coodsigaaga uu weli gacanta lagu haayo ama haddii la soo diiday coodsigaaga.

Waxii warar dheeri ah:

www.iom.no
www.udi.no



– Haddii lagu siiyay degnaanta, waxaa jiro wax aad u badan oo laga baranayo Norway

Cutubka 7aad

Markii lagu siiyay fasaxa degganaashaha ee Norway

Waxuu cutubkaan kuu micnaynayaa waxa dhacaayo haddii lagu siiyo fasaxa degganaanta ee Norway, ay ku jiraan fursadaha aad ku helaysid meelo aad ku noolaatid iyo noocyada waxbarasho oo la heli karo.

Waxaa loo bixiyaa xarunta soo-dhowaynta magangalyada si ku meel gaar ah inta aad sugaysid jawaabta coodsigaaga magangalyo. Mar haddii lagu siiyo fasaxa degganaanta ee Norway, waxaad ka baxaysaa xarunta soo-dhowaynta magangalyada.

Waxaad lahaanaysaa labo doorasho:

1) Waxaad raadsanaysaa naf-ahaantaada meel aad ku noolaatid adiga oo caawinaad ka helaynaynin maamulada. Haddii aad sidaas samaysid, waa inaad adiga maaraysataa maaliyadda ku baxayso.
2) Waxaad kala shaqayn kartaa xarunta soo-dhowaynta magangalyada iyo Agaasinka Is-dhexgalka iyo Kala duwanaanta (IMDI) si loo helo meel aad ku noolaatid.

Adiga ayaa naf-ahaantaada u heli karo meel aad ku noolaatid. Markii ay sidaas tahay, waa inaad haysataa lacag kugu filan oo aad ku kaalmaysid naftaada iyo qooyskaaga sababta oo ah inaan lagu siinayn wax caawinaad ah si aad u heshid meel aad ka degtid munishiibiyadaada cusub.

Haddii aad ku xiran tahay kaalmada maaliyadeed ee lagaa siiyo maamulada guud, waxay xarunta soo-dhowaynta magangalyada iyo IMDI kaa caawinayaan inaad heshid maamul deegaan oo aad deggi kartid. Waxuu IMDI ku siinayaa hal fursad oo dejin ah. Haddii aad diidid, waxaad dhuminaysaa xaqqa aad ku joogaysid xarunta soo-dhowaynta magangalyada. waxaad kale oo aad dhuminaysaa kaalmada maaliyadeed.

Waraysiga dejinta

Markii adiga iyo xarunta soo-dhowaynta magangalyada aad heshaan la socodsiinta ah in lagu siiyay fasaxa degganaanta ee Norway, waxaa la qabanqaabinayaa fadhi loo hadlaayo dejintaada. Waxay ujeeddada fadhigaan yahay in la ogaado waxa aad doonaysid inaad samaysid mustqabalka. Waa muhiin in la helo munishiibiyo kugu habboon. Waraysiga dejinta waa in lagu qabtaa labo toddobaad gudahood markii lagu siiyay fasaxa degganaanta.

Waxay xarunta soo-dhowaynta magangalyada iyo IMDI ku salaynayaan raadintooda munishiibiyada wararka

Waxaad iskaa u heli kartaa meel aad ku noolaato adiga oo aan ka helin wax caawinaad ah maamulada, ama waxaad sidaas u samayn kartaa adiga oo la kaashanaysid xaruntaada soo-dhowaynta magangalyada iyo IMDI.

Waxuu IMDI go'aaminayaa muniishibiyada lagu dejinaayo. Waxuu IMDI iskudayayaa inuu tixgeliyo waxaad ku soo sheegtay waraysigaaga dejinta.

aad adiga siiday waraysigaaga dejinta. Waxaa sidaas darteed muhiim ah inaad sheegtid nooca shaqada, tabobaridda ama waxbarashada dheeriga ah oo aad jeceshahay. Waaa inaad u sheegtaa haddii aad horay ugu lahayd qooyska gudaha Norway, iyo warar kale oo muhiim u ah halka aad rabtid inaad degto.

Inta lagu jirro waraysiga dejinta waxaa lagu siinayaa warar wax ku ool ah ee ku saabsan habka aad ku helaysid munishiibiyada ku maligelinayso.

Dejinta

Waxuu xafiis gobaleedka ee IMDI go'aaminayaa munishiibiyada lagu dejin doono. Waxuu IMDI isku dayayaa inuu tixgeliyo waxaad ku sheegtay waraysigaaga. Laakin had iyo jeer suurto gal ma aha in la helo munishiibiyada ku habboon waxa aad si fiican u jeceshahay. Waxuu IMDI kuu helayaa halka aad ku lahaanaysid fursadda aad ku helaysid shaqo ama waxbarasho dheeri ah adiga oo ka qaybqaadanaysid barnaamajka is-barashada. Waxaad sidaan aad uga akhrisataa qaybta daboolayso barnaamajka is-barashada.

Raadi meelaha ku siinayaan waxa aad raadinaysid. Waxay hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta magangalyada ku tusin karaan sida looga raadsado munishiibooyinka kala duwan ee Norway. Haddii aad tahay ka qaybqaataha firfircoon ee habsocodsiinta waxaa aad u fududaanaayo helitaanka meel aad ku noolaatid.

Waxay dad badan rabi karaan inay degaan isla aagga, ama ay helaan meel ku dhow deegaankooda ay markii koowaad doorteen.

Waxay dad badan rabi karaan inay degaan isla magaalada. Waxay munishiibiyo kasto lee-dahay tiro xadidan oo ah meelo la dego, ma la gayn karo qof kasto deegaankii oo markii koowaad doortay.

Haddii aad oggolaatay dejinta lagaa siiyay munishiibiyada, waxaad sii joogi kartaa xarunta soo-dhowaynta magangalyada ilaa magaalada ku martigelinayso ay diyaar u noqonayso inay ku oggolaato. Inta ay la egtahay inaad sii joogti xarunta soo-dhowaynta magangalyada waqtiba waqti ayuu ka duwan yahay.

Markii la go'aamiyo halka aad degi doontid, waxay la soo xiriiraysaa adiga iyo xarunta soo-dhowaynta magangalyada. Waxay kugu soo wargelinayaan halka lagaa siinaayo guri iyo marka aad u guuri kartid. Waxa kale oo lagu

siinayaa warar kale oo wax ku ool ah ee ku saabsan guuritaanka.

Xasuuso inuu IMDI ku siinaayo hal siismo oo keliya (hal mar oo keliya ayuu guri ku siin doona). Haddii aad diidid siismadaan, waxaad dhuminaysaa kaalmada lacageed oo aad qaadanaysay waana inaad ka guurtaa xarunta soo-dhowaynta magangalyada.

Barashada Norwejiyaanka

Dadka intooda badan la siiyay fasaxa deganaanata waxay xaq u lee-yahiin, waajibaadna ka ah, inay tagaan casharka luqadda Norwejiyaanka. Waa inaad dhammaysid fasalkaan si aad u hesho fasaxa degganaanta joogtada ah ama jinsiyadda Norwejiyaanka.

Waa inaad dhammaysid fasalka luqadda Norwejiyaanka ka hor dhammaadka seddaxdaada sanadood ee koowaad ee aad joogtid Norway. Waxaa nidaamkaan lagu dhaqayaa kuwa la siiyay fasaxa degganaanta Norway ka dib 1 Sebtembar 2005.

In lagu hadli karo Norwejiyaanka waxay muhiim u tahay in la fahmo iyo lagu fahmo, in la helo shaqo ama waxbarasho, iyo ka qaybqaadatid bulshada Norwejiyaanka. Haddii u lahayd xirfadaha Norwejiyaanka fiican ama luqadda Sami, waxaa lagaa dhaafi karaa barashada khasabka ah ee luqadda.

Waxaa mas'uul ka ah munishiibiyadaada barashada luqadda Norwejiyaanka. Iyaga ayaa go'aaminaayo inaad dhigatid fasallada Norwejiyaanka. Haddii aadan helin waxbarashada aad xaqqa u lee-dahay, waxaad xaq u lee-dahay inaad soo samaysatid cabasho.

Barnaamajka Is-barashada

Waa inay dadka intooda badan la siinaayo fasaxa degganaanta qayb ka qataan barnaamajka is-barashada. Waxaad ku soo biiraysaa dhowaan barnaamajka markii aad u soo guurto magaaladaada ku martgelinayso. Waa barnaamaj waxbarasho oo aad xaq u lee-dahay oo dhammaan dadka soo gelootida qaangaarka ah ee asal ahaan qaxooti ah oo ay da'dooda u dhexayso 18 iyo 55 jir xaq iyo waajib u lee-yahiin inay tagaan.

Waxay ujeeddada barnaamajkaan tahay in laguu fududeeyo helitaanka shaqada, in awood laguu siiyo inaad kaalmaysid naftaada iyo qooyskaaga. Waxaa ku jirro nidaamka is-barashada ragga iyo dumarka labadooda. Waxaad baranaysaan Norwejiyaanka iyo bulshada Norewejiyaanka iyo nolosha shaqada.

Markii lagu siiyay fasaxa degganaanta, waxaad xaq u lee-dahay inaad dhigatid fasalka waxbarashada luqadda Norwejiyaanka. Waa inaad dhamaysid waxbarashadaan si aad u hesho fasaxa degganaanta ama u heshid jinsiyadda Norwejiyaanka.

Waxbarashada lagugu siiyay barnaamajka is-barashada waxuu ku cabiran yahay asalnimadaada iyo qorshayaashaada ee mustaqbalka.

Waxbarashada lagu bixiyay barnaamajka is-barashada waxay ku cabiran tahay asalkaaga iyo qorshayaashaada mustaqbalka.

Barnaamjka is-barashada waa barnaamj waqti-buuxo, shan maalin toddobaadkii, oo ku dhamaanaayo ilaa labo sanadood.

Haddii aad heshid shaqo lacag leh oo aad noqotid qof leh madaxbanaani maaliyadeed, waxaad ka bixi kartaa barnaamajka ka hor dhammaadka labada sano. Waa inay munishiibiyada ku siiso oggolaanshaheeda haddii aad jeceshahay inaad ka baxdid barnaamajka.

Waxaa lagu siinayaa deeq hordhac ah intii aad dhiganaysid barnaamajka is-barashada. Waa mushahar lagu dhiganaayo barnaamajka. Waxuu barnaamajka is-barashada lee-yahay nidaamyo badan oo ah isla kuwa shaqada. Waa inaad ka bixisaa canshuur barnaamajka deeqda aad qaadatid, waana lagaa jarayaa deeqda haddii aad uga maqnaatidna sabab la'aan. Waxaa laguu oggol yahay inaad qabatid shaqo dheeri ah ee saa'id ku ah barnaamajka is-barashada.

Waxay munishiibiyadaada mas'uul ka tahay nidaamka hordhaca. Waxay kale ay munishiibiyadaada go'aaminaysaa haddii ay tahay inaad tegtid barnaamajka is-barashada.

Waxaad xaq u lee-dahay inaad ka soo cabatid haddii aan laguu oggolaanin inaad ka qaybgashid barnaamajka is-barashada. waxay hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta magangalyada kuu sheegayaan waxa ku saabsan nidaamka hordhaca.

Waxbarashada

Markii lagaa siiyay Norway fasaxa degganaanta sare, waxaa laguu oggolaaday inaad wax ka barato jaamacad ama college-ka waxbarashada sare. Waxaa jiraan dhoowr shuruudadood ee waxbarashada sare. Haddii aad ka haysatid shahaadooyin dhulkaaga hooyo, waa inay maamulada Norwejiyaanka aqoonsadaan. Waxaad waydiisaa faahfaahinada hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta magangalyada ama xarunta waxbarashada dadka qaangaarka ah.

Lambarka aqoonsiga shakhsiga iyo jinsiyadda

Markii lagu siiyay fasaxa degganaanta, waxaa lagu siinayaa lambarka aqoonsiga shakhsiga Norwejiyaanka. Waxuu muhiim u yahay lambarkaan si loo garto bixinta caymiska bulshadeed, daawaynta caafimaadka, waxbarashada ama fasaxa shaqada ee Norway. Waxaa ku siinayo lambarka aqoonsiga shakhsiga Diiwaangeliyaha Dadka ee Qaranka.

Isu-keenidda qooyska

Markii lagu siiyay fasaxa degganaanta, waxay xubnaha sokeeye ee qooyska soo coodsan karaan kinay ugu soo biiraan Norway. Waa inay ka soo coodsadaan safaaradda Norwejiyaanka ee ugu dhow, qunsuliyadda ama ergayda. Waxaa la oggol yahay sanadkiiba mar.

Waxay yahiin xubnaha sokeeye ee qooyska kuwa is-qabo iyo lamaanayaasha diiwaangashan, lamaanayaasha isla deggan in ka badan labo sandood ee joogto ah iyo caruurta ka da' yar 18 jir. Waxaa kale oo laga siin karaa Norway degganaansho qaar kale oo ka mid ah xubnaha qooyska.

Marar aad u badan waa inaad haysataa xooga dakhli ah ka hor inta aan loo soo oggolaanin xubnaha qooyskaaga inay yimaadaan Norway.

Waxay kale dadka ku imaanaayo Norway nidaamka isu-keenidda qooyska xaq iyo waajib u lee-yahiin inay dhigtaan luqadda Norwejiyaanka. Kuwa badan oo ka mid ah waxay u qalmaayaan barnaamajka is-barashada. Ka akhriso wax badan ee ku saabsan kor.

Waxaa jiraan nidaamyo badan oo muhiim u ah in la raaco markii aad soo coodsanaysid nidaamka isu-keenidda qooyska. Waxaad wararka aad u baahan tahay ka helaysaa shabakadda internet-ka ee UDI (www.udi.no). Waxay wararka ku tarjuman yahiin luqado badan ee kala duwan. Waxaad waydiisaa hawlwadeenada xarunta soodhowaynta magangalyada haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo wararka saxda ah.

Hoygaaga cusub

Markaad u soo guuraysid guri ama dabaq, waxaa jiraan waxyaabo badan oo ah inaad siidid taxadir. Haddii aadan hubin waxa ku saabsan sida loo xanaaneeyo guriga, waxaa aad u fiican inaad waydiisid intii aad sugi lahayd inay wax qaldamaan. Hawlwadeenada maamulka deegaankaaga ayaa awoodo inay ka jawaabaan su'aalahaada.

Mas'uuliyadda.

Haddii aad ku nooshahay guri kiro ah, waxaad mas'uul ka tahay gacan ku hayntiisa gudaha. Waxaa sidaan ka mid ah gacan ku haynta dabaqyada, derbiyada, saqafyada, waxyaabaha ku xir-xiran, iyo dhammaan alaabta guriga. Haddii adan ugu dhoowrin gurigaada dayactir fiican, waxaad bixinaysaa wax kasto oo ka jabo

Biilasha

Markaad si madaxbanaan u nooshahay, waxaa lagugu soo dirayaa si joogto ah bilaal ee la rabo Inaad bixiso. Waxaa ka

Marka lagu siiyo fasaxa degganaanta, waxay xubnaha sokeeye ee qooyskaaga soo coodsan karaan inay kugu soo biiraan Norway.



Waxuu Nidaamka Caymiska Qaranka siinayaa sugnaanta maaliyadeed kuwa aan shaqayn karin soona gelayn wax ay ku noolaadaan. Si aad u heshid kaalmooyinka badbaadada bulshada, waa inaad ka soo baxdaa dhoowr sharuudadood.

mid ah kirada, korontada, shatiga telefishanka iyo telefoonka. Waxaa biilasha laguugu soo dirayaa boostada. Waa inaad bixisid kiradaada bil kasto. Haddii aysan munshiibiyada gelin korontada gurigaaga cusub, waa inaad adiga ka fikirtaa.

Haddii aadan ku bixin lacagta biilashada waqtiga lagaa doonaayo, waxaa laguu soo dirayaa xasuusin- oo laga yaabo inuu la socdo kharashka dheeriga ah ee xasuusinta. Haddii aadan weli bixin waxa lagugu lee-yahay, waxaa arrinta loo gudbinayaa wakaaladda amaahda soo ururiso. Waxay micnaheedu yahay in lagaa xaraashaayo alaab ku qiimo ah inta lagugu yeeshay, ama waxaad bixinaysaa kharash dheeri ah oo ganaax ah. Waxaa kale lagu gelinayaa liiska madoow ee amaahda oo kaa hor istaagaayo in lagu siiyo amaah.

Caysmika

Waa inaad ka caymisa debka, daadka iyo xatooyada hantidada iyo gurigaga, Waxay micnaha gelinta caymiska yahay inaad ka helaysid magdhow waxii maaliyad ahaan qasaartay haddiiba ay sidaasi dhacdo. Waxuu caymiska lagu bixiyaa lacag.

Debka

Waa In guri kasto lee-yahay ugu yaraan hal kiciye deb ah Iyo qalabka debka lagu demiyo. Waxaa deb-demiyaha loo isticmaalayaa in debka looga saaro habka korontada ama qalabka. Debka aan koronto la socon waa in lagu shubaa biyo ama in la daboolo ilaa uu ka demo. Haddii uu deb kaco, waa inaad ka wacdaa adeegga deb-demisaka 110.

Caymiska Qaranka

Nidaamka Caymiska Qaranka ee Norway waxuu siiyaa dadka lambarka caymiska bulshadeed ee kaalmada lacageed. Xasuuso inuu dembi yahay in si been-abuur ah loo sheegto kaalmada badbaada bulshadeed.

Waxuu Nidaamka Caymiska Qaranka ee Norway siiyaa sugidda maaliyadeed kuwa aan shaqayn karin oo aan soo gelin wax ay ku noolaadaan. Si aad u mudatid kaalmada sugidda bulshadeed, waa inaad ka soo baxdaa dhoowr shuruudadood. Ma u haysano buuggaan yar meel aan ku wada sheegno. Waxaa kaa siin karo xafiiskaaga deegaanka ee sugidda bulshadeed wararka aad u baahan tahay. Waxaa halkaan ku xusan liiska kuwa ugu caansan kaalmadas ugidda bulshadeed:

Kaalmada jirrada

Haddii aad jirran tahay oo aadan tegi karin shaqo, waxaad xaq u lee-dahay kaalmada la siiyo dadka jirran si loo kabo mushaharka ka go'ay. Waa inaad

ka shaqaynaysay ugu yaraan afar todobaad goobta shaqada si aad u mudatid kaalmda dadka jirran, waxaana xaq u lee-dahay kaalmada jirrada maalinta ugu horayso oo aad ka fadhiisatay shaqada. Waxaa la bixiyaa kaalmada jirrada dhammaadka bisha.

Kaalmada cunugga jirran

Waxaad xaq u lee-dahay inaad soo codsatid kaalmada lagu bixiyo cunugga jirran haddii aad ka joogsanaysid shaqada si aad u la socotid cunug ka da' yar 12 jir oo aad mas'uul ka tahay. Kaalmada xanaanaynta cunugga waxay ku xadaysan tahay dhoor maalmood sanadkii iyo cunuggiiba.

Kaalmada dadka tabarta daran

Haddii aadan u shaqayn karin sabab jirro joogto ah ama dhaawac, waxaad xaq u lee-dahay kaalmada dadka tabarta daran oo ku meel gaar ah ama hawlgabka curyaanimada. Waxaad mudan kartaa kaalamada dadka tabarta daran haddii aadan shaqayn karin intii muddo ah. Waxaa la bixiyaa hawlgabka curyaanimada haddii la ogaado inaadan marnaba shaqayn karin mar kale.

Hawlgabka waayeelka

Markii aad gaarto shaqo ka fadhiisad, caadi ahaan 67 jir, waxay dowladda ku siinaysaa hawlgabka waayeelka . Inta uu la eg yahay hawlgabka waxay ku xiran tahay inta aad qaadan jritay markii aad shaqaynaysay naftaada. Waxuu qof kasto oo gaaray 67 jir xaq u lee-yahay hawlgabka dowladda ee ugu yar.

Haddii aad jeceshahay inaad ogaatid sida loo xisaabo hawlgabka waayeelka, ama inta aad rajaynaysid in lagu siiyo markii aad ka fadhiisatid shaqada kala xiriir xafiiska badbaadada bulshada ee deegaankaada.

Kaalmooyinka badbaadada bulshada

Waxay adeegyada bulshada kaa caawini karaan xal u helidda ama ka hortegidda dhibaatooyinka bulshada. Waxay kale oo ay adeegyada bulshada ka khasban yahiin inay u helaan meel ay degaan kuwa aan awoodin inay helaan meel ay ku noolaadaan. Waxay dadka aan shaqayn karin ama aan iskood isu-kaalmayn karin laga siinayaa kaalmo maaliyadeed xafiiska badbaadada bulshada ee deegaanka.

Waa inaad waydiisataa adeegyada bulshada caawinaad haddii aad u baahatid. Waxaad xaq u lee-dahay inaad ka qaadatid racfaan haddii coodsigaada gacansiinta la soo diido.

Ka akhriso waxii warar dheeri ah:

www.nyinorge.no
www.imdi.no
www.udi.no
www.velkommenoslo.no
www.aetat.no
www.skatteetaten.no
www.trygdeetaten.no

– Waxay caruurta aan lala socon xaq u lee yahiin xanaano dheeri ah xarunta soo-dhowaynta magangalyada

Cutubka 8aad

Magangalyo-doonka ka yar 18 jir

Haddii aad ka yar tahay 18 jir oo aad timid Norway adiga oo la socon waaliddiintaada, waxaad ka mid noqonaysaa kooxda lagu magacaabo caruurta aan lala socon oo ah magangalyo-doonka.

Markaad timid Norway, waxaa laguu shegay waxa aad la kulmaysid haatan oo aad noqotay Magangalyo-doon. Caruurta aan qaangaarka ahayn (caruurta iyo dadka dhallinta yar ee ka yar 18 jir) waxay u qabaan baahi gaar ah badbaadin. Waxaan Cutubkaan kuugu micnaynaynaa fursadaha aad qabtid iyo waxa xaqqa u lee-dahay inta lagu jirro waqtigaaga biloowga ah ee Norway.

Xarunta soo-dhowaynta ee caruurta aan lala socon

Waxuu lee-yahay cunugga magangalyo-doonka ah ee lala socon xuquuq gaar ah. Waxay lee-yahiin xarumaha soo-dhowaynta magangalyo-doonka unugyo gooni u ah caruurta magangalyo-doonka aan lala socon iyo tobaneeyo-jirka. Waxaa unugyada joogo hawlwadeeno saacad kasto. Mid ka mid ah dadka ka shaqeeyo xarunta soo-dhowaynta ayaa si gaar ah u noqonaayo xiriiriyahaada. Waxay hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta mas'uul ka yahiin adiga, waxayna kugu caawinayaan baahidaada maalinba-maalinta xigto.

Ilaaliyaha

Markii aad timaado Norway, waxaa laguu magacaabayaa ilaaliye. Waxuu ilaaliyahaada hubinayaa in aad qaadatid dhammaan kaalmooyin aad xaqqa u lee-dahay. Waxuu kale asaga ama iyada la soconayaan danahaada sharciyeed iyo maaliyadeed. Waxaad waydiisaa hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta magangalyada waxii ku saabsan caawinaada uu ku siinaayo ilaaliyahaada.

Qareenka

Waxaa kale oo lagu siinayaa qareen ku caawiyo. Waxuu qareenkaaga kaa caawinayaa coodsiga magangalyada ee Norway. Waa inaad caadi ahaan la kulantaa qareenkaaga ka hor waraysigaaga oo aad la yeelanaysid UDI, asaga ama ayada ayaa kugu cawinayaan diyaarinta waraysigaas. Ka dib, adiga iyo qareenkaaga waxaad maraysaan waraysiga waxaana hubinaysaan inay caddaynta sax tahay. Haddii coodsigaaga magangalyada la soo diido, waxuu qareenkaaga kaa cawinayaa ka qaadashada racfaanka. Ka akhriso wax Intaa ka badan ee ku saabsan habsocodsiintaan Cutubka 1aad.

Waxbarashada

Cunug walba ee ku nool Norway waa inuu aada dugsi. Haddii da'daada u dhaxeyso 6 Iyo 16 jir, waxaad aadi doonta dugsiga hoose ama kan dhexe. Waxay xarutaada soo-dhowaynta magangalyada kugu qoraysaa dugsi. Haddii aad jirtid 6 ilaa 16 jir, waxaad dhiganaysaa dugsiga hoose ama kan dhexe. Waxay xaruntaada soo-dhowaynta magangalyada ku qoraysaa dugsiga kugu habboon. Haddii ay da'daada u dhexayso 16 ilaa 18 jir, waxaad xaq u lee-dahay inaad dhigatid waxbarashada luqadda norwejiyaanka. Waxaad kale oo xaq u lee-dahay waxbarashada maad-dooyinka laga barto heerka dugsiga dhexe. Waxay ujeeddada laga lee-yahay tahay inaad ka qaybqaadato imtixaanka dugsiga dhexe. Waxay hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta magangelyada la xiriiriyaan dugsiga waxayna hubinayaan inaad heshid caawinaadda layligaaga guriga.

Barnaamajka wararka

Waxaad ka baran doonta dugsiga maad-dooyin badan.. Laakin waxaa jiraan waxyaabo loo baahan yahay inaad ogaatid uusan dugsiga daboolayn. Bacdamaa aad tahay magangalyo-doon waxaad u baahan tahay inaad ogaatid wax aad xaq u lee-dahay iyo fursada aad lee-dahay. Waxaad kale oo u baahan tahay inaad ogaatid waxii aad samayn leheed naf-

taada markii aad ku jirtid xaalado kale duwan. Waxay hawlwadeenada xaruntaada soo-dhowaynta magangalyada kuu sheegayaan waxa ku saabsan kuwaan iyo dhoowr arrimo kale oo qayb ka ah barnaamajka wararka.

Xaqiijinta da'da

Waxay dadka qaangaarka ah qaarkood sheegtaan da' ka yar 18 jir sababta oo ah waxay u malaynayaan inay siinayso fursad aad u fiican oo ay ku helaan in lagu siiyo magangalyada. Waa sababtaan waxay ay UDI ay u samaynayso baaritaanka caafimaadka si loo ogaado da'da qofka magangalyo-doonka ah. Waxaad oggolaan kartaa baaristaan ama waa diidi kartaa, laakin waxay dhaciifinaysaa codsigaaga haddii aadan marin baaritaankaan.

Waxii warar dheeri ah:

www.noas.org
www.bip.no
www.udi.no

Raadinta waalidiinta iyo qaraabada

Markii aad imaanaysid Norway, waxaa lagugu caawinayaa soo helidda waalidiintaada, haddii ay weli nool yahiin. Waxaa kale oo lagu siin karaa caawinaadda lagu helaayo qaraabadaada kale. Haddii aad bixisid warar ka caawinaayo helitaanka qooyskaaga, aad ayay u sii fududaanaysaa in lala xiriiro.

Waxaad kala hadli kartaa hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta magangalyada si looga ogaado wax intaa ka sii badan oo ah sida aad iskugu dayi karto oo aadna u heli kartid qooyskaaga.

Dejinta

Waxuu UDI wax uga qabanayaa coodsiyada caruurta magangalyo-doonka ah si uga degdegsan coodsiyada kale. Waxaa sidaan loogu samaynayaa inaad si gaaban u joogtid xarunta soo-dhowaynta haddii ay suurto gal tahay.

Haddii lagu siiyo fasaxa degganaanta ee Norway, waa inaad ka heshaa in lagu siiyo dejin maamulka deegaanka in aan ka dambayn seddax bilood ka dib markii uu UDI ku siiyay fasaxa joogista halkaan.

Kala hadal hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta magangalyada waxii warar dheeri ah ee ku saabsan xaaladdaada.

Dib ugu laabashada dalka

Haddii aad jeceshahay Inaad dib ugu laabatid dalkaaga, waxaad waydiin kartaa hawlawadeenada xarunta soo-dhowaynta magangalyada sida aad u heli kartid caawinaadda lagu qabanqaabinaayo socdaalkaaga. Ka akhriso waxii warar dheeri ah Cutubka 6aad.

Lacagta

Waxaad u baahan tahay lacagaad jeebka ku ridatid intii aad joogtid xarunta soo-dhowaynta magangelyada. Waa sii badanaysaa xisaabta aad qaadanaysid haddii aad adiga soo gadanaysid cuntadaada iyo badeecooyin. Waxaa lacagta looga dan lee-yahay Inay daboosho dharka, daawooyinka caafimaadka, Isdaawaynta, Iwm. Waxaa la soconaayo maareeyaha xaruntaada soo-dhowaynta magangalyada lacagtaada haddii aad tahay cunug magangalyo-doon ah oo lala socon. Adiga ayaa la gaaraayo go'aan waxa lacagta lagu bixinaayo. Waxaad waydiisaa hawlwadeenada xarunta soo-dhowaynta inta ay la eg-tahay lacagta aad xaqqa u lee-dahay.

– Waxuu buggaan yar ku siinaya warar muhiim ah. Haddii aad doonaysi inaad sii ogaato wax itaa ka badan, waxaad waydisaa hawlwadeena-da xarunta soo-dhowaynta.

Sawirka iyo la tashiga waxaa sameeyay: Geelmuyden.Kiese. Sawir: Lillan Jonassen, Ole Walter Jacobsen, Trond Isachsen, maktabadda sawirada ee UDI. Soo saarey: Jonny Fladby.

Utlendingsdirektoratet

Agaasinka Soo-gelootiga Norwejiyaanka (UDI)
PO Box 8108 Dep.
NO-0032 Oslo
Norway

Cinwaanka xafiiska: Hausmannsgate 21
Tel: +47 2335 1500
Fakis: +47 2335 1503
www.udi.no www.nyinorge.no
Email'ka: udi@udi.no